KULMIYE

# BARNAAMIJ SIYAASADEEDKA XISBIGA KULMIYE 2024 - 2029

# BARNAAMIJ SIYAASADEEDKA XISBIGA KULMIYE 2024 – 2029

# Han Aqoonsi iyo Himilo Qaran

# Horaa Loo Soconayaa

# TUSMADA BARNAAMIJKA


| | |
|---|---|
| Ereyga Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Somaliland, Ahna Murrashaxa Madaxwayne ee Xisbiga Kulmiye | 08 |
| Ereyga Murrashaxa Madaxweyne ku Xigeenka Xisbiga Kulmiye | 10 |
| Ereyga Guddoomiyaha Xisbiga Kulmiye. | 12 |
| Hiigsiga, Himilada iyo Mabaadii'da Xisbiga Kulmiye | 14 |
| Waxqabadka Muddo Xileedka Labaad ee Xisbiga Kulmiye | 16 |
| **Tiirka 1aad:** Arrimaha Dibedda | 23 |
| **Tiirka 2aad:** Amniga | 28 |
| Amniga Gudaha. | 30 |
| Amniga Dibedda | 31 |
| **Tiirka 3aad:** Horumarinta Dhaqaalaha | 33 |
| Horumarinta Waxsoosaarka. | 34 |
| Horumarinta Xoolaha | 34 |
| Horumarinta Beeraha | 37 |
| Horumarinta Kalluumaysiga | 41 |
| Horumarinta Maaliyadda | 44 |
| Baananka iyo Hay'adaha Maaliyadda | 46 |
| Ganacsiga iyo Dalxiiska | 48 |
| Horumarinta Xabkadaha iyo Faleenka | 50 |
| Horumarinta Maalgashiga | 52 |
| Kaabayaasha Dhaqaalaha | 55 |
| Jidadka | 55 |
| Garoomada Diyaaradaha | 58 |
| Dakadaha | 59 |
| Tiknoolajiyadda iyo Hal-abuurka | 61 |

| | |
|---|---|
| Macdanta, Shidaalka iyo Tamarta | 64 |
| Maaraynta Deeqaha Caalimaga ah | 66 |
| **Tiirka 4aad:** Adeega Bulshada | 68 |
| Barashada iyo ku Dhaqanka Diinta | 69 |
| Horumarinta Adeega Bulshada | 71 |
| Waxbarashada | 71 |
| Tacliinta Sare | 76 |
| Caafimaadka | 78 |
| Horumarinta Khayraadka Biyaha iyo Fayodhawrka | 81 |
| Daryeelka Bulshada | 85 |
| Haweenka | 89 |
| Dhallinyarada iyo Ciyaaraha | 90 |
| Hirgelinta Nidaamka Caymiska ee Shaqaalaha Dawladda | 93 |
| Cududa Shaqaalaha Dawladda | 94 |
| Kaydka Raashinka iyo Maaraynta Masiibooyinka | 95 |
| Horumarinta Dhawrista Tayada | 97 |
| Warbaahinta | 99 |
| Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guriyeynta | 101 |
| Barakacayaasha | 103 |
| **Tiirka 5aad:** Horumarinta Dawladnimada | 105 |
| Adkaydnta Dibmuqraadiyada | 106 |
| Horumarinta Maamul-wanaaga | 108 |
| La Dagaalanka Musuqmaasuqa. | 109 |
| Maamuldaadajinta Adeegyada Bulshada | 110 |
| Horumarinta Nidaamka Iibka Qaranka | 112 |
| Horumarinta Garsoorka iyo Cadaalada. | 112 |
| **Tiirka 6aad**- Maaraynta Deegaanka iyo Isbedelka Cimillada | 115 |

# Ereyga Madaxwaynaha ahna Musharaxa Xisbiga Kulmiye



Waxa xaqiiqo marag madoon ah in Jamhuuriyadda Somaliland ay tahay qaran jira oo leh shacab hal adag, go'aanna ku gaadhay in iyagu kaligood ka taliyaan masiirka nolashooda iyo mustaqbalka dalkooda. Go'aankaasi waxa uu keenay la soo noqoshada madaxbanaanida Jamhuuriyadda Somaliland oo maanta ah qaran madaxbanaan, dimuqraadi ah, kuna dhisan nidaamka xisbiyada badan.

Xisbiga Kulmiye, isaga oo ka duulaya Dastuurka iyo shuruucda dalka, waxa uu mar walba uu taagan yahay dhawrista qarannimada iyo madaxbanaanida Jamhuuriyadda Somaliland, difaaca dalka iyo adkaynta mabaadii'da dimuqraadiyadda.

Shacabka Somaliland waxa ay Xisbiga Kulmiye kalsoonidooda iyo codkooda ku siiyeen sannadkii 2010 in uu dalka taladiisa ku hogaamiyo ilaalinta qarannimada iyo horumarinta nolosha bulshada, taas oo ay ka dhalatay xukuumaddii koowaad ee xisbiga ee uu gadhwadeenka ka ahaa mudane Madaxweyne Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo) oo dalka u horseeday horumar ballaadhan oo dhinac walba leh.

Waxa mar labaad shacabka Somaliland sannadkii 2017 kalsooni ku siiyay Xisbiga Kulmiye in uu sii hayo talada dalka, taas oo ay ku timid xukuumadda labaad ee Xisbiga Kulmiye oo sii ambaqaaday, halkiina ka sii wadday horumarka ay bilowday xukuumaddii koowaad ee xisbigu. Inkasta oo ay naga hor yimaadeen xaaladdo adag iyo duruufo kala duwani, haddana waxa Ilaahay mahaddii ah in aanu fullinay ballanqaadyadii ku jiray Barnaamij Siyaasadeedka Xisbiga 2017 in ka badan 80%, sidoo kalena ay noo qabsoomeen guulo muuqda oo dhinac walba leh sida Heshiiska Is-Afgarad (MoU) ee Somaliland iyo Ethiopia, fidinta iyo tayeynta adeegyada daryeelka bulshada, tayeynta waxbarashada dalka, kobcinta adeeg-bixinta caafimaadka, ballaadhinta biyaha magaalooyinka iyo gaadhsiinta biyaha degaannada miyiga, horumarinta iyo casriyeynta kaabayaasha dhaqaalaha iyo wax soosaarka, xoojinta maamul wanaagga iyo maamul daadejinta, abuurista fursado shaqo oo dhallinyarada loogu talla galay, hirgelinta barnaamijka Shaqo Qaran, dhismaha Hoyga Taariikhda Somaliland iyo qabashada doorashooyinkii isku sidkanaa ee Golaha Wakiillada iyo Golayaasha Deegaanka.

Annaga oo ka duulayna xaqiijinta waxqabadka iyo meel marinta ballanqaadyadii Xisbiga Kulmiye lagu doortay, ka jawaabayna hiigsiga iyo himilada qaranka, kana faa'iidaysanayna waayo-aragnimada xisbi iyo xukuumadeed ee aannu dheernahay axsaabta kale ee tartanku naga dhexeeyo, waxa aanu mar kale ballanqaadaynaa in aanu sii adkayn doono difaaca qarranimadda iyo madaxbanaanida Jamhuuriyadda Somaliland, sii wadidda iyo xoojinta dedaaladda la xidhiidha aqoonsi raadinta, hirgelinta waxqabad muuqda oo ku salaysan baahiyaha aasaasiga ah ee shacabka Somaliland iyo gaadhsiinta horumar dhaqan-dhaqaale oo wax wayn ka bedela nolosha dadkayga taas oo ah waajibaad qaran oo na saaran.

Haddaba, waxa aan idiinka codsanayaa in aad na siisaan codkiina, kalsoonidiina iyo taageeradiina si aanu si hagar la'aan ah oo daacadnimo ku jirto idiinku shaqayno anaga oo idiin ballanqaadayna xaqiijinta in Jamhuuriyadda Somaliland noqoto dal caalamku aqoonsanyahay, shacabkiisuna horumaran yahay.

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxwaynaha JSL, ahna Musharraxa Madaxweynaha ee Xisbiga Kulmiye**

# Ereyga Musharaxa Madaxweyne Ku-Xigeen ee Xisbiga Kulmiye



Xukuumadihii kala dambeeyey ee Xisbiga Kulmiye ee ku yimid doonista iyo doorashada shacabka, waxa ay dedaal badan u galeen fulinta barnaamij siyaasadeedyadii Xisbiga Kulmiye oo keenay guulo iyo horumar midho dhal ah.

Muddo xileedkii labaad ee xisbiga Kulmiye ee uu hoggaaminayey Madaxwayne Muuse Biixi Cabdi, meel marinta ballanqaadyadii xisbiga oo fulay ka sokow, waxa xukuumaddu dalka kala soo dabaalatay duruufo

adag oo qaar ka mid ahi gaar inoo yihiin sida duufaantii Sagar, gubashadii Suuqyada Waaheen iyo Wajaale iyo abaaro, iyo kuwo aynu adduunka kala siman nahay oo aan ka xusi karno xanuunkii halista ahaa ee COVID-19, saamaynta dhaqaale ee ka dhalatay amni darrada Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed iyo dagaalka Yukrayn. Waxa aan xaaladahaa kaga soo gudubnay hoggaamin adag iyo isku duubni ummadeed.

Xisbi ahaan, annaga oo ka duulayna waayo aragnimada hoggaamineed ee labada muddo xileed aad nagu aaminteen talada dalka, waxa aanu sii wadi doonaa horumarka dhaqan dhaqaale ee xukuumadihii Xisbiga Kulmiye dedaalka ugu jireen iyo ballanqaadyo waxqabad oo cusub oo si cad ugu qeexan barnaamij siyaasadeedka Xisbiga Kulmiye 2024-2029 ee doorashada soo socota uu Xisbigu tartanka ku galayo. Barnaamijkani waxa uu xambaarsan yahay qorshayaal iyo aragtiyo cusub oo diiradda saaraya dardargelinta iyo kobcinta horumarka dalkeena sida beeraha, ganacsiga, adeegyada bulshada, kaabayaasha dhaqaalaha, dalxiiska, wax soosaarka, macdanta, tiknoolajiyadda, maalgashiga iyo shaqo abuurka.

Sidaa darteed, doorashada soo socota, anigoo ah murrashaxa Madaxwayne ku-xigeen ee Xisbiga Kulmiye waxa aan halkan idinkaga codsanayaa inaad codkiina na siisaan taas oo ka dhigan inaad dooranaysaan mustaqbal ifaya oo keenaya koboc dhaqaale iyo horumar bulsho oo ay horseed ka yihiin hoggaamiyeyaal ay ka go'an tahay inay xaqiijiyaan himilooyinka ballaadhan ee dalkeena, oo ay ugu horreyso in Somaliland muddada dhow ka mid noqoto dalalka la aqoonsan yahay ee caalamka.

**Maxamuud Xasan Sacad (Saajin)**
**Musharaxa Madaxweyne ku-xigeen ee Xisbiga Kulmiye**

# Erayga Guddoomiyaha Xisbiga Kulmiye



Xisbiga Midnimada iyo Horumarka (Kulmiye) isagoo raacaya himiladiisa iyo qorshaha horumarinta qaranka (NDP 2aad iyo 3aad) si loo gaadho hiraalka guud ee qaranka oo ka turjumaya rabitaanka shacbiga Somaliland, waxa uu sameeyay dadaalo horumarineed oo isdaba joog ah muddadii 14-ka sano ahayd ee uu hoggaaminayay dalka.

Xisbiga Kulmiye muddo xilleedkiisii koowaad ee uu hoggaaminayey aasaasihii xisbiga Mudane Madaxwayne Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo) oo ahaa hoggaamiye hayin iyo siyaasi waayo-arag ah, waxa aynu dal iyo dad ahaanba samaynay horumar la taaban karo muddadii uu xilka hayay.

Mar labaad, Xisbiga Kulmiye waxa uu soo xulay Mudane Madaxwayne Muuse Biixi Cabdi oo halkaa ka sii waday geedigii horumarinta qaranka Somaliland iyo gaadhsiinta in dalkeenu helo aqoonsi caalami ah oo imika ififaalihiisu intii hore ka soo dhowaaday.

Xisbiga Kulmiye waxa ka go'an inuu sii ambaqaado taabbogalinta horumarka, tayaynta adeegyada bulshada, xasilloonida siyaasadeed iyo koboca dhaqaale. Waana taas, sababta muddo xileedka sadexaad ay mar kale xubnaha golaha dhexe ee Xisbiga Kulmiye u soo xuleen mar labaad mudane Madaxwayne Muuse Biixi Cabdi inuu noqdo murrashaxa Madaxwayne ee xisbiga Kulmiye si aqoontiisa, waxqabadkiisa, bisaylkiisa siyaasadeed iyo xogo-ogaalnimadiisa arrimaha geeska iyo caalamka u yahay hogaamiye xilligan ku haboon marxaladana dalka kala dabaalan kara si uu u dhamaystiro helista aqoonsiga Jamhuuriyadda Somaliland. Sidoo kale, waxa uu xisbigu u soo xulay murrashaxa Madaxwayne Ku-xigeen mudane Maxamuud Xasan Sacad (Saajin) oo ah ruugcadaa siyaasadeed oo leh aqoon iyo waayo-aragnimo, muddo dheerna ku soo jiray siyaasadda.

Waxa aanu halkan idinku soo gudbinaynaa Barnaamij Siyaasadeedka Xisbiga Kulmiye ee 2024 – 2029 oo xambaarsan aragtida xisbigu uu dalka ku hoggaamin doono muddo xileedkiisa saddexaad.

Waxa aan ka codsanayaa shacabka Jamhuuriyadda Somaliland in ay codkooda ugu deeqaan musharixiinta jagooyinka Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka Xisbiga Kulmiye, si aynu u sii wadno gaadhista hiraalka qarankeena ee ah dal xasilloon, la aqoonsan yahay, dimuqraadi ah oo barwaaqo ah, dadkiisuna ay ku naaloodaan nolol tayo sarraysa.

Ugu dambayn, waxa aan halkan si milge leh ugu mahad celinayaa aqoonyahannada soo diyaariyey ee isku hawlay Barnaamij Siyaasadeedka Xisbiga ee 2024-2029. Waxa aan sidoo kale u mahadcelinayaa dadka tirada badan ee gudo iyo dibedba si toos ah iyo si dadbanba uga qayb qaatay wax ku biirinta barnaamijka xisbiga ee 2024-2029.

**Maxamed Kaahin Axmed**
**Guddoomiyaha Xisbiga Kulmiye**

# HIIGSIGA XISBIGA KULMIYE

Somaliland xasilloon, la aqoonsan yahay, barwaaqo ah, dadkeedu ku midaysan yahay dareen waddaniyadeed, kuna nool yihiin nolol tayo sare leh.

# HIMILADA XISBIGA

Helista aqoonsi buuxa oo Jamhuuriyadda Somaliland ka mid noqoto dalalka la aqoonsan yahay iyo bulshada caalamka; sugidda amniga, midnimada, wadajirka iyo badbaadada muwaadiniinta Somaliland; kobcinta ilaha dhaqaalaha, wax soosaarka, maalgashiga, abuurista fursado shaqo iyo horumarinta kaabayaasha dhaqaale; xoojinta iyo fidinta adeegyada bulshada iyo kor u qaadista hawlaha daryeelka bulshada; horumarinta dawladnimada, adkaynta dimuqraadiyadda, xoojinta daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka; xoojinta maaraynta deegaanka iyo u adkaysiga saamaynta isbedelka cimillada.

# Mabaadi'da Xisbiga Kulmiye

- Ilaalinta qarannimada, madaxbannaanida iyo midnimada dhuleed ee Jamhuuriyadda Somaliland
- Dhawrista xuquuqaha aasaasiga ah ee dastuurku u damaanad qaaday muwaadiniinta Somaliland.
- Dhawrista sharafta iyo karaamada muwaadiniinta iyada oo laga duulayo diinta islaamka iyo dastuurka.
- Dhawrista kala madaxbanaanida waaxyaha dawladnimada; waaxda fulinta, waaxda garsoorka iyo waaxda xeerdejinta.
- Xoojinta sugidda amniga, wadajirka bulshada iyo degaananshaha dalka.
- Adkaynta ku dhaqanka sharciga iyo u-sinaanta garsoorka iyo cadaaladda.
- Horumarinta dawladnimada iyo dardargalinta adeeg bixinta dawladda.
- Dardargalinta kobaca dhaqaalaha iyo dhiirigalinta hal-abuurka, ganacsiga, wax soosaarka iyo maal-gashiga.
- Xoojinta maamul wanaagga iyo daah-furnaanta.
- Kor u qaadista kaalinta haweenka iyo dhalinyarada ee ka qaybgalka hoggaanka dalka.
- Qabashada doorashooyin xor iyo xalaal ah oo waqtigooda ku dhaca.
- Dhawrista degaanka iyo la jaanqaadka isbeddelka cimilada.
- Xoojinta daris wanaagga iyo nabad kuwada noolaanshaha dalalka jaarka.
- Xoojinta xidhiidhka iyo iskaashiga ay Somaliland la leedahay dalalka caalamka.

KULMIYE

Xisbiga Midnimada iyo Horumarinta Somaliland

# HOGAANKA
## XISBIGA KULMIYE



**Maxamed Kaahin Axmed**
Guddoomiyaha Xisbiga



**Cabdicasiis Maxamed Samaale**
Guddoomiye ku Xigeenka 1aad ee Xisbiga



**Axmed Cabdi Xuseen**
Guddoomiye ku Xigeenka 2aad ee Xisbiga



**Saleebaan Cali Koore**
Guddoomiye ku Xigeenka 3aad ee Xisbiga



**Maxamuud Xasan Sacad Saajin**
Guddoomiye ku Xigeenka 4aad ee Xisbiga



**Faysal Cabdiraxmaan Madar**
Xoghayaha Guud ee Xisbiga

# Waxqabadka Muddo Xileedka Labaad ee Xisbiga Kulmiye

Barnaamij Siyaasadeedka Xisbiga Kulmiye 2017-2022 uu ku galay ololihii doorashada Madaxtooyada, waxa uu ka koobnaa **7** tiir; **48** qaybood iyo **382** ballanqaad, barnaamijkaa oo shacabka Somaliland mar labaad codka ku siiyay Xisbiga inuu dalka hoggaamiyo. Hadaba, waxa u suurto galay xukuumadda Xisbiga Kulmiye in ay si buuxda u fuliso **80.6%** (**308** ballanqaad), **13.4%** (**51** ballanqaad) aanay dhamaystirmin fullintoodu, halka **6.0%** (**23** ballanqaad) gabi ahaanba aan la fullin. Sidoo kale, waxa xukuumadda u suurto gashay hirgelinta **118** waxqabad oo aan ku jirin ballanqaadyada Barnaamijka Siyaasadeedka Xisbiga Kulmiye 2017. Waxa u suurto galay muddo xileedka labaad Xisbiga Kulmiye in uu qabto qodobadan soo socda:

## Somaliland iyo Fagaarayaasha Caalamka

- Saxeexa heshiiska is-afgarad ee dhex maray Somaliland iyo Ethiopia iyo ku dhawaaqista Ethiopia in ay diyaar u tahay aqoonsiga Somaaliland.
- **80+** warbixino qoraal ah oo warbaahinta ugu caansan caalamku ku falanqeeyeen arrimaha Somaliland.
- Safarkii taariikhiga ahaa ee madaxwaynaha JSL ku tegay dalka Maraykanka 2022 iyo hirgelinta wadashaqaynta Somaliland iyo Maraykanka.
- Booqashooyin rasmi ah oo madaxwaynuhu ku tagay waddamada: Ethiopia, Isku-tagga Imaaraatka Carabta, Kenya, Gini Kanaakori iyo Djibouti.
- **40+** dal oo madaxda xukuumadda Somaliland ay booqashooyin rasmi ah ku tageen.
- **45+** wafti oo dalka yimid oo ka koobnaa **140** mudane baarlamaan, **19** wasiir iyo **76** danjire oo dalka soo booqday.
- Xidhiidh diblumaasiyadeed oo cusub oo Somaliland iyo Taiwan yeesheen.

## Xoojinta Amniga iyo Xasiloonida

- Kordhinta tirada iyo tayada ciidamada kala duwan; Ciidanka Qaranka, Booliska, Asluubta, Ilaalada Xeebaha, Socdaalka, iyo Dabdamiska (dhismayaal cusub, qalabayn iyo casriyeyn) iyo kordhinta mushaharkooda.
- Hirgelinta dugsiyada tababarka saraakiisha, saraakiil-xigeenada, iyo xirfadlayaasha ciidamada.

- **700+** Caaqil oo lagu tabobaray hanaanka xallinta khilaafaadka rabshadaha wata si loo yareeyo isku dhaca deegaamaysan.
- Gaadhsiinta **78** degmo oo darajadoodu **D** tahay kabka dawladda dhexe u qabato dawladaha hoose si loo dardargaliyo horumarka degmooyinka.

## Kobaca Dhaqaalaha

- **10%** heerka sicir-bararka aanu dhaafin.
- **16%** oo qiimaha shillinka Somaliland kor u kacay iyo qiimihiisa oo xasilan.
- **56.8%** koboca dhaqaalaha dalka isaga oo gaadhay **$ 3,571** bilyan sanadkii 2023.
- **40%** koboca dakhliga qofka (per capita income) oo gaadhay **$804** sanadkii 2022.

## Adeegyada lagu Taageeray Xoollo-dhaqatada iyo Beeralayda

- **21,033,686+** neef ayaa adeeg caafimaad, daawayn iyo nafaqeyn loo sameeyay iyada oo xoolo dhaqato tiradoodu tahay **156,374+** qof ay ka faa'ideysteen.
- **10,383,000**+ neef ayaa ka dhoofay dekedda Berbera.
- **46,200+** neef ayaa lagu xooleeyey tiro dhan 2300 oo qoys.
- **2,994,413+** lm oo ah xidh-xidhka (moosaska) beeraha ayaa la sameeyay.
- **280,000+** oo sacadood oo qoditaan ah ayaa loo qeybiyay beeralayda danyarta ah.
- **181,664+** hektar ayaa laga buufiyay Ayax.

## Adeegyada lagu Xoojiyay Kalluumaysiga

- Deked kalluumaysi ayaa laga dhisay magaalada Maydh.
- 100+ agab ah oo isugu jira doonyo, mishiinada doonyaha, shabaakta kalluumaysiga iyo qalab kale ayaa la gaadhsiiyay kallumeysatada dalka.

## Dardargalinta Ganacsiga, Suuqa Xorta ah iyo fududaynta Isu-socodka

- **790km+** oo waddooyinka cusub ayaa la dhisay.
- **294km+** oo wadooyin ayaa la dayactiray.
- **11** Biriish, **128** Buundooyinka biyo mareenka ah (Culverts) iyo **167** oo ah buundo-jiifta ayaa la dhisay.
- **334km+** daraasado farsamo oo la xidhiidha waddooyin cusub ayaa la

sameeyay.

- Dib u dhiska madaarka Berbera iyo casriyaynta madaarka Hargeysa.
- Dayactirka iyo balaadhinta madaarada Burco, Ceerigaabo iyo Boorama.
- Dhisidda madaarka cusub ee Caynaba iyo sahaminta madaarka Saylac ee deegaanka Tokhoshi.
- **260%** ayuu kordhay awoodda adeeg-bixinta dekedda Berbera, iyadoo ka mid noqotay **siddeeda** dekedood oo isbedel muuqda sameeyay aduunka oo dhan, kana gashay kaalinta **106-aad** ee adeeg wac-naanta qiimaynta Baanka Aduunku soo saaray ee lagu sameeyay **405** dekadood oo Caalamka ah.
- Caymiska gaadiidka ayaa markii u horaysay ka hirgalay Somaliland.
- Xarunta hubinta tayada badeecadaha Berbera ayaa la dhisay laguna qalabeeyay Shaybaadh casri ah.

### Dardargalinta Adeegsiga Tiknoolajiyadda

- **40%** Wasaaradaha iyo hay'adaha madaxabanaan ee dawladda ayaa si joogta ah u adeegsada Tiknoolajiyadda Casriga ah (e-government) sida nidaamka FMIS.
- Mareegta Qaran (national portal) ee lagu baahiyo xogta dawladda ayaa la sameeyay.
- Xarunta Hal'abuurka Somaliland (Somaliland Ennovation Zone SEZ) ayaa la hirgaliyay.

### Horumarinta Adeegyada Waxbarashada

- **1,213+** Dugsi oo isugu jira kuwa cusub, balaadhin iyo dayactir ayaa la hirgaliyay.
- **135%** ayaa la kordhiyey dhismayaasha dugsiyada dalka.
- **1,524,700** Buugagta manhajka qaranka ayaa loo qaybiyay ardayda dugsiyada.
- **170%** ayaa la kordhiyay tirada macallimiinta lana gaadhsiiyey **14,432** macallin.
- **7+** dugsiyo farsamo gacan ayaa la hirgaliyay.
- **52%** ayaa korodhay tirada ardayda dugsiyada hoose/dhexe iyada oo tiradoodu gaadhay in ka badan **406,360** arday.
- **36%** ayaa korodhay tirada ardayda dugsiyada sare iyada oo tiradoodu gaadhay in ka badan **80,705** arday.
- **2000+** oo tablet iyo **60+** screen-nada waawayn oo solar leh kuna duuban tahay dhamaan casharada dugsiyada ayaa loo qaybiyay

ardayada deegaanada fogfog.

- **3500+** Macallin ayaa la tababaray.

### Kobcinta Adeegyada Caafimaadka

- **100%** ayaa la kordhiyey tirada cisbataalada waawayn ee gobolada iyada oo la dhisay **17** cisbataal oo cusub.
- **116%** ayaa lagu kordhiyay xarumaha hooyada iyo dhallaanka iyada oo lagu daray **152** xarumood oo cusub.
- **71%** ayaa la kordhiyay shaqaalaha caafimaadka.
- **49%** ayuu kor u kacay adeeg-bixinta caafimaadka dalka.
- **8,063,910** oo muwaadin ayaa adeegyo caafimaad loo fidiyey 2017 ilaa 2023.
- **714,825** caruur ah oo laga tallaalay xannuuno kala duwan.
- **81%** ayaa kor loo qaaday xirfadlayaasha caafimaadka dalka.
- **50%** ayaa hoos loo dhigay dhimashada hooyada ama umul-aroorka (Maternal Mortality and morbidity Rate).

### Gaadhsiinta Bulshada Biyo Nadiif ah

- **45%** ayaa kor loo qaaday helitaanka biyaha ee bulshada ku nool miyi iyo magaalo.
- **184+** ceel biyood oo dhaadheer iyo kuwo gaagaaban ayaa la qoday.
- **122+** dhaam-biyood, iyo doox-xidh (sand/sub-surface dam) ayaa la sameeyay.
- **322+** ceelashii hore u jiray ayaa cillad saar iyo dayactir lagu sameeyey.
- **400+** goobood ayaa lagu sameeyay daraasado lagu sahaminayo biyaha dhulka hoostiisa ku jira.
- **18,500,000** litir ayaa kor loo qaaday awoodda soo saarka biyaha ee Geedeeble iyada oo **1.2 Milyan** qof oo Hargeysa ku nool ay heli doonaan biyo ku filan.

### Daryeelka Bulshada Nugul:

- **5,618,022** qof oo dan yar ah ayaa la gaadhsiiyay loona qaybiyay raashin.
- **350,115+** qof ayaa ka faa'idaystay barnaamijyadda lacagaha taakulada ee daryeelka bulshada.
- **15,410+** oo isugu jira baaskiiladdaha socodka, usha cad iyo kabaha dheelitirka socodka ee dadka naafadda ah ayaa la qaybiyay.

- **3,254+** qof ayaa ka faa'iidaystay qaliinadda fudud ee dadka naafadda ah.

## Fursadaha Dhalinyarada loo Abuuray:

- **65,000+** oo dhalinyaro ah ayaa ka faa'iidaystay aqoonta online ah (courseara) oo ay fududaysay Wasaaradda Shaqogalinta, Arimaha Bulshada iyo Qoyska.
- **51,500+** dhalinyaro ah ayaa helay tababar iyo kaalmo dhaqaale.
- **10+** garoon ciyaareed ayaa la dhisay, lana cusuboonaysiiyay.
- **95+** tartan-ciyaareed oo kala duwan ayaa laga qabtay gobolada dalka oo dhan.
- **20,000+** dhalinyaro ah ayaa la siiyay tababar iyo xirfado kala duwan.
- **3,500+** oo dhalinyaro ah ayaa ka faa'iidaystay Barnaamijka Shaqo Qaran.

## Xoojinta iyo Kor u Qaadista Awoodda Haweenka

- **40,902+** haween ah oo isugu jira kuwa aqoontoodu heer jaamacadeed gaadhsiisan tahay iyo kuwa kaleba ayaa loo sameeyay tababarro iyo kobcin xirfadeed.
- **25,245+** haween ah ayaa fursado shaqo iyo maalgalin helay.
- **233+** dufcadood ayaa kor loogu qaaday horumarinta xirfadaha hogaaminta ee haweenka, iyadoo ujeedadu ahayd in ay haweenku ka qayb qaataan talada dalka.

## Dawladnimada iyo Maamul-wanaagga

- **294+** baadhis maaliyadeed ayaa lagu sameeyay dawladda-dhexe iyo dawladaha hoose, si kor loogu qaado isla xisaabtanka.
- **14,854** shaqaale cusub ayay dawladdu qaadatay taas oo tirada shaqaalaha dawladda ka dhigtay **26,917+.**
- **1,000+** oo qandaraas ayaa si daahfuran loogu tartamay.
- **Baasaboorka Somaliland** ayaa la casriyeeyay.
- **20,800+** qof ayaa ka qalin jabiyay Xarunta Barashada Waddaniyadda iyo Dastuurka.
- **47+** xeer ayaa xukuumaddu curisay oo ka noqonaysa **48%** xeerarka dalka xeerarkii la curiyey intii Somaliland jirtay.
- Nidaamka Maamulka Shaqaalaha Dawladda ee (HRMIS) ayaa la hirgaliyay.

- **8,381+** shaqaale dawladeed ayaa kor loo qaaday xirfaddooda iyo aqoontooda.

## Kobcinta Adeegyada Garsoorka iyo Cadaaladda

- **3,500+** maxbuus ayaa si bille ah loo siiyaa adeeg caafimaad .
- **4,058+** da'yarta sharciga khilaafta oo loo sameeyey xabsi-ka-leexin (Juvenile Diversion System).
- **240+** maxbuus oo xukunkoodu dhammaaday oo xabsiyada ugu jiray xuquuq madani ah ayaa Wasaaradda Cadaaladda fududaysay sii dayntooda.
- **4,850+** oo dadka nugul ah ayaa la siiyay kaalmo sharci (legal Aid) oo bilaash ah.
- **9,000+** oo kiisaska madani ah ayaa lagu xaliyay nidaamka xalinta khilaafaadka.
- **725+** maxbuus ayaa xirfad iyo aqoon kala duwan lagu tababaray.
- **650+** sarkaal ayaa kor loo qaaday aqoontooda dalka gudihiisa iyo debediisa.
- Afar xabsi oo cusub ayaa la hirgeliyay, shan xabsi oo hore u jirayna waa la dayactiray.

## La Jaanqaadista Isbedelka Cimilada

- **3,000,000+** oo geed ayaa la qaybiyay, lana beeray si deegaanka loo badbaadiyo.
- **14+** seerayaal oo la xayndaabay halka 52 kale la diiwaan galiyay.
- **25%** ayaa hoos loo dhigay jarista dhirta laga sameeyo dhuxusha.
- **25,000+** xabbo oo girgirayaasha dhuxusha beekhaamiya ayaa la qaybiyay.
- **862+** xayawaan duur-joog oo laga badbaadiyay dhoofin sharci daro ah.

## Taakulada iyo Dib-u-dhiska Suuqa Waaheen:

- **3,216+** meherado ganacsi ayaa lagu taakuleeyey lacag dhan **$10,670,651.55** oo dollar dadkii khasaaraha dabka Waaheen gaadhay.
- **$4,110,364.77** ayaa mulkiilayaasha **211** dhime oo ku gubtay suuqa Waaheen lagu kaalmeeyay oo u dhigantaa **45%** kharashka dib u dhiska dhismaayasha.
- **$19,500,000** ayaa lagu dhisayaa qaybta suuqa Waaheen ee Dawladda Hoose ee Hargeysa leedahay oo ka kooban **861** meharadood.
- **2,015** oo shaqaale ka shaqayn jiray suuqa ayaa la gaadhsiiay lacag

kaalmo ah oo midkiiba la siiyey **$ 270.**

## Hoyga Taariikhda Qaranka

- Waxa laga dhisay caasimadda Hargeysa Hoyga Taariikhda Somaliland oo ah xarun kayd oo bulshada ku xidhaysa taariikhdooda isla markaana baraysan sooyaalka Somaliland. Waxa kale oo loogu talo galay in bulshada Somaliland iyo dalxiisayaashu ay booqdaan si ay bartaan una arkaan facwaynaanta iyo aasaarta taariikhda Somaliland.





1

TIIRKA 1aad

# ARRIMAHA DIBEDDA

# Arrimaha Dibedda

Himilada koowaad ee siyaasadda arrimaha dibedda ee Jamhuuriyadda Somaliland waa helista aqoonsi caalami ah oo uu udub-dhexaad u yahay nabad kula noolaanshaha shucuubta caalamka, adkaynta deris wanaagga wadamada jaarka, iskaashi la yeelashada wadamada adduunka iyo ka mid noqoshada golayaasha caalamiga ah sida; Qaramada Midoobay, Midowga Afrika, Jaamacadda Carabta, Ururka Iskaashiga Islaamka iyo Ururka Barwaaqo Sooranka (Commonwealth). Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisii labaad waxa uu sameeyay dedaallo iyo xidhiidho isdaba joog ah oo uu ku xaqiijinayo gaadhista himilooyinkiisa oo ay ugu horayso qadiyadda madaxbanaanida dalku.

## *Muddo xileedka labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:*

- *Waxa la saxeexay heshiiska is-afgarad ee dhexmaray Jamhuuriyadda Somaliland iyo Dawladda Federaalka ah ee Ethiopia, heshiiskaasi oo dhigaya in Somaliland aqoonsi buuxa ka hesho Ethiopia, halka ay Somaliland ka kiraynayso Ethiopia saldhig ay ciidamada baddeedu adeegsadaan.*
- *Waxa xoogaystay wadashaqaynta Somaliland iyo Maraykanka ka dib safarkii taariikhiga ahaa ee madaxwaynaha JSL ku tegay dalka Maraykanka 2022, kaas oo keenay in taariikhda markii u horaysay xeer xusaya iskaashiga Somaliland iyo Maraykanka uu soo baxay.*
- *Waxa uu madaxwaynaha JSL ku tagay booqashooyin wadamada: Ethiopia, Isku-tagga Imaaraatka Carabta, Kenya, Gini Kanaakori iyo Djibouti. Booqashooyinkaa oo adkeeyay xidhiidhada diblamaasiyadeed iyo iskaashi ee Somaliland ay la leedahay wadamadaas, korna u qaaday qaddiyada madaxbanaanida JSL.*
- *Waxa suurto gashay in wufuud kala duwan oo ka socota Jamhuuriyadda Somaliland oo uu hormuud u yahay Wasiirka Arimaha Dibaddu ay booqoashooyin kala duwan ku tageen in ka badan* ***40*** *dal oo dunida ka mid ah si ay u xoojiyaan dedaallada aqoonsi raadinta. Sidoo kale, waxa soo booqday dalka* ***45*** *wafti oo ka koobnaa* ***140*** *mudane baarlamaan,* ***19*** *wasiir oo ay ka mid yihiin wasiiro arrimo dibadeed iyo* ***76*** *danjire oo ka kala socday dalal kala duwan oo caalamka ka mid ah.*
- *Waxa xidhiidh diblumaasiyadeed oo cusub lala yeeshay dalka Taiwan, waxana sidoo kale xoogaystay xidhiidhadii iskaashi ee Somaliland la lahayd waddamada Ethiopia, Isku-tagga Imaaraatka, Kenya, iyo Djibouti.*
- *Waxa dalka ka shaqo galay sadex xafiis-diblumaasiyadeed oo cusub oo ay leeyihiin wadamada Imaaraatka, Taiwan iyo Kenya.*
- *Waxa kor loo qaaday tayada iyo awoodda xafiisyada Somaliland ku leedahay wadamada caalamka.*




**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** waxa uu sii wadi doonaa dedaallada aqoonsi-raadinta iyo helidda saaxiibo cusub isaga oo qaadi doona tallaabooyinka soo socda:

- Waxa uu sii xoojin doonaa dedaallada lagu xaqiijinayo helitaanka aqoonsi caalami ah oo Somaliland ka hesho caalamka.
- Waxa uu sii xoojin doonaa dedaallada ay Somaliland xubinimo buuxda ku helayso si ay uga mid noqoto ururada caalamiga ah sida Qaramada Midoobay, Midowga Afrika, Ururka Iskaashiga Islaamka iyo Ururka Barwaaqo Sooranka (Common wealth). Sidoo kalena kuwa heer gobol sida Jaamacadda Carabta, IGAD iyo Suuqa Guud ee Bariga iyo Koonfurta Afrika (COMESA).
- Waxa uu sii wadi doonaa abuurista xidhiidho diblumaasiyadeed oo cusub oo aasaas u noqon kara iskaashi dhinacyada diblumaasiyadda, dhaqaalaha iyo ganacsiga.
- Waxa uu adeegsan doonaa diblomaasiyadda dadweynaha (public diplomacy) si loo gaadhsiiyo bulshooyinka caalamka taariikhda Somaliland, geedi socodka dimuqraadiyadda, iyo guulaha horumar ee Jamhuuriyadda Somaliland.
- Waxa uu qaban doonaa doodo sharci iyo taariikheed oo lagu qabto fagaarayaal heer caalami ah si loo sugo xaqnimada iyo sharcinimada la soo noqoshada madaxbanaanida Jamhuuriyadda Somaliland iyada oo la adeegsanayo khubaro aqoon sare u leh sharciga caalamka, aqoonta dhaqaalaha iyo siyaasadda.

- Waxa uu dejin doonaa qorshayaal lagu hawl galiyo hay'adaha qaabeeya fikirka bulshada (Think Tank) si loo dardargaliyo dedaalada aqoonsi raadinta.
- Waxa uu adeegsan doonaa warbaahinta caalamiga ah si adduunka loo gaadhsiiyo wararka iyo horumarka Jamhuuriyadda Somaliland.
- Waxa uu kor u qaadi doonaa ololayaasha diblumaasiyadda casriga ah (Digital Diplomacy) iyada oo mareegta iyo baraha bulshada la adeegsanayo.
- Waxa uu xoojin doonaa xidhiidhka iyo iskaashiga Somaliland la leedahay dalalka caalamka dhinacyada dhaqaalaha, ganacsiga, nabadgalyada iyo la dagaallanka argagixisada, tahriibta iyo budhcad badeedda.
- Waxa uu dhisi doonaa machad lagu barto diblomaasiyadda oo heer caalami ah soona saara, diblumaasiyiin iyo shaqaale xirfad u leh arrimaha dibedda.
- Waxa uu kor u qaadi doonaa awoodda hawlqabad ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda si loo dardar galiyo hawlaha ay wasaaraddu u xil saaran tahay ee ay ugu horayso aqoonsi raadintu.
- Waxa uu kordhin doonaa tirada iyo tayada xafiisyada diblomaasiyadeed ee ay Jamhuuriyadda Somaliland ku leedahay dalalka caalamka.



- Waxa uu xoojin doonaa xafiisyada u xil saaran ganacsiga (commercial attaches) ee ka mid ah safaaradaha, qunsuliyadaha iyo xafiisyada Jamhuuriyadda Somaliland ku leedahay dalalka dibedda si loo xoojiyo ganacsiga soohdimadaha ka tallaaba iyo isku-socodka dhaqdhaqaaqa ganacsi ee wadamada geeska.
- Waxa uu dardar galin doonaa wada shaqaynta isku-xidhka qurbajoogta reer Somaliland ee dibedda ku nool iyo Wasaaradda Arrimaha Dibedda.





2

## TIIRKA 2aad

# AMNIGA

# Amniga

Sugnaanta amniga, nabadgalyada iyo degenaanshuhu waxa ay lafdhabar iyo xuddun u yihiin xasilloonida siyaasadda, koboca dhaqaale, iskaashiga iyo wadajirka bulsho iyo badbaadada nafta, sharafta iyo hantida muwaadiniinta Somaliland. Sidoo kale, xoojinta iyo adkaynta amnigu waa mudnaanta koowaad ee Xukuumadda Xisbiga Kulmiye si qaranka Jamhuuriyadda Somaliland u noqdo mid joogteeya kaalinta muuqata ee uu kaga jiro amniga gobolkan Geeska Afrika, Mandiqadda Bariga Dhexe iyo guud ahaan dunida.

Muddo xileedka labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa uu mudnaan gaar ah siiyay adkaynta amniga isaga oo kordhiyay miisaaniyadda ku baxda guud ahaan amniga laguna sameeyay casriyayn iyo tayayn xoog leh dhammaan noocyada ciidamada iyo hay'adaha kale ee ka shaqeeya amniga.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Waxa dib u casriyeyn lagu sameeyay dhammaan qalabka, dhismeyaasha, tirada iyo tayada ciidamada kala duwan ee dalka.*
- *Waxa la furay dugsiyada tababarka saraakiisha, saraakiil-xigeenada, iyo xirfadlayaasha ciidamada, waxana la kordhiyay mushaharka ciidamda kala duwan.*
- *Waxa la hirgeliyay cusbitaallo ku qalabaysan qalab casri ah, si kor loogu qaado adeegga caafimaad ee ay heelaan ciidamadu.*
- *Waxa dhamaan gobollada laga hirgeliyey hannaanka iskaashiga booliska iyo bulshada ee loo yaqaanno (community Policing) si loo xoojiyo kaalinta dadweynuhu ku leeyihiin sugidda amniga iyo nabadgelyada dalka.*
- *Waxa **700** oo Caaqil oo ku kala sugan dhammaan gobolladda dalka lagu tabobaray hanaanka xallinta khilaafaadka rabshadaha wata si loo yareeyo isku dhaca deegaamaysan.*
- *Waxa **78** degmo oo darajadoodu tahay **D** la gaadhsiiyay kabka dawladaha hoose ay xukuumaddu u qabato si loo dardargaliyo horumarka degmooyinka.*
- *Waxa la hirgeliyay ka qayb qaadashada bulshada ee diyaarinta miisaniyadaha dawladaha hoose.*



**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** waxa uu mudnaanta siinayaa xoojinta amniga gudaha iyo dibedda:

## Amniga Gudaha

- Waxa uu xoojin doonaa amniga guud iyo xasilloonida iyada oo la tayeynayo, lana casriyeynayo dhamaan ciidamada kala duwan ee qaranka.
- Waxa uu kordhin doonaa tababarrada xirfadeed ee la siiyo saraakiisha iyo shaqaalaha hay'adaha amniga si loo tayeeyo waxqabadkooda, xidhiidhka ay bulshada la leeyihiin iyo isla xisaabtanka.
- Waxa uu kor u qaadi doonaa awoodda booliska ee baadhista dembiyada ka dhasha tiknoloojiyada casriga ah iyo baraha bulshada.
- Waxa uu dhisi doonaa saldhigyo iyo rugo cusub oo ay ciidamadu ku hawl galaan iyada oo dib u habayn iyo casriyeyn lagu samayn doono saldhigyada iyo rugaha hore u jiray.
- Waxa uu samayn doonaa siyaasado iyo tallaabooyin lagaga hortago, laguna maareeyo khilaafaadka soo noqnoqda.
- Waxa uu xoojin doonaa kaalinta madaxdhaqameedka ee maaraynta xasaradaha si kor loogu qaado wadajirka bulshada, xasilloonida iyo nabad ku wada noolaanshaha.

- Waxa uu kordhin doonaa wacyiga bulshada ee ku saabsan khataraha iyo fahamka qaldan ee la xidhiidha tahriibka sharci darrada ah.
- Waxa uu xoojin doonaa barnaamijyo lagu wacyi galinayo bulshada oo la xidhiidha khataraha haysashada hubka fudud ee sharci darrada ah.
- Waxa uu xoojin doonaa fulinta shuruucda iyo siyaasadaha la xidhiidha qaxootiga iyo magangelyo doonka.
- Waxa uu samayn doonaa Xarunta Isku-xidhka Badbaadinta Badda oo leh awood jawaab celin si ay uga hawlgasho raadinta iyo badbaadinta degdegga ah ee badda.



## Amniga Dibedda

- Waxa uu sii wadi doonaa tayaynta iyo xoojinta awoodda ciidanka qaranka si uu uga hortago khataraha ka iman kara dalka dibaddiisa.
- Waxa uu sii xoojin doonaa sugidda amniga xuduudaha dalka si loo xakameeyo falalka amni darro sida argagixisada, koontarabaanka, iyo soogalootiga sharci darrada ah.
- Waxa uu sii xoojin doonaa xidhiidhka iyo wadashaqaynta ay Jamhuuriyadda Somaliland la leedahay dawladaha gobolka iyo dunida kale si looga hortago khataraha isaga gudba xuduudaha.

- Waxa u dhisi doonaa ciidamada iyo shaqaalaha dawladda guryo ay degaan.
- Waxa uu xoojin doonaa doorka ay Jamhuuriyadda Somaliland ku leedahay adkaynta xasiloonida Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed.
- Waxa uu iskaashi iyo wada shaqayn dhow kala yeelan doonaa waddamada deriska ah iyo kuwa caalamka dhinacyada la dagaallanka argagixisada, ilaalinta amaanka Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed, iyo la dagaallanka budhcad badeedda.





# 3

## TIIRKA 3aad

# HORUMARINTA DHAQAALAHA

# Horumarinta Dhaqaalaha

Muddo xileedka labaad ee Xisbiga Kulmiye, dhaqaalaha Somaliland waxa uu sameeyay koboc xoog leh, iyada oo dhaqaalaha guud (GDP) uu ahaa **$2,920** million sannadkii 2018, halka uu sannadka 2022 ka gaadhay **$4,567** million, taas oo muujinaysa in dhaqaalaha guud **(GDP)** uu kor u kacay **56.4%** muddadii u dhaxaysay 2018 ilaa 2023. Sidoo kale, dakhliga qofka (per capita income) ee Somaliland ayaa sannadka 2022 gaadhay **$788**, halka uu sannadkii 2018 ka ahaa **$578**, taas oo muujinaysa in dakhliga qofku uu kordhay **36.3%** muddadaas.

## Horumarinta Wax soosaarka

Horumarinta wax soosaarka gudaha sida xoolaha, beeraha iyo kalluunku waxa ay lafdhabar u yihiin sugnaanta cuntada iyo kor u kac dhaqaale oo waara. Sidaa darteed, waxa Xisbiga Kulmiye lagama maarmaan u arkaa in la horumariyo wax soosaarka si aynu uga baaqsano raadinta caawimo dibadeed iyo si aynu u gaadhno dhabada isku-filaanshaha dhanka wax soo saarka.

## Horumarinta Xoolaha

Xoolaha nooli waa laf-dhabarta dhaqaalaha dalka iyada oo dhoofka xoolaha nooli yahay isha koowaad ee dhaqaalaha dalka. Sidoo kale, boqolkiiba konton (**50%**) dadweynaha reer Somaliland waxa ay nolol maalmeedkoodu ku tiirsan yahay si toos ah ama si dadban dhaqashada, iibgaynta iyo ka ganacsiga xoolaha nool. Sidaa darteed, Xisbiga Kulmiye waxa uu xoogga saaray kobcinta, horumarinta iyo xannaaneynta ilaha wax soosaarka, si gaar ahna waxa uu ahmiyad u siiyay daryeelka xoolaha nool.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- ***69%** ayaa la kordhiyay miisaaniyadda Wasaaradda Xanaanada Xoolaha.*
- *Waxa la gaadhsiiyay adeeg caafimaad, daawayn iyo nafaqeyn xoolo dhan **21,033,686** oo neef, iyada oo xoolo dhaqato tiradoodu tahay **156,374** qof ay ka faa'ideysteen.*
- *Waxa la hirgeliyay mashruuca xoolo qaybinta dadka xooluhu ka baxeen iyada oo **46,200** neef lagu xooleeyey tiro dhan **2300** oo qoys.*
- *Waxa la dhisay **25** dhisme oo isugu jira xarumo bixiya adeegga caafimaadka xoolaha, sheybaadho, iyo sayladaha xoolaha.*
- *Waxa ay xukuumadu dadaal u gashay xoojinta suuqyadii xoolaha loo dhoofin jiray iyo daah-furka suuqyo cusub oo sabab u noqday in ay dekedda Berbera ka dhoofaan xoolo ka badan **10,383,000** neef oo isugu jira geel, adhi iyo lo' taas oo lacagta adag ee ka soo gashay iibka xoolaha ay wax wayn ka tartay shaqo-abuurka, dakhliga xoolo-dhaqatada iyo dhaqdhaqaaqa suuqa ganacsi iyo dakhliga dawladda.*



**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** Isaga oo mudnaanta siinaya horumarinta xannaanada xoolaha iyo daryeelkooda si ay kaalin wax ku ool ah uga galaan suuqyada dhoofka xoolaha dunida loogana helo cad iyo caano cafimaad qaba:

- Waxa uu xoojin doonaa habka ka-hortagga, xakamaynta iyo la socoshada cudurrada xoolaha iyo helitaanka dawooyin tayo leh, si kor loogu qaado caafimaadka xoolaha nool.
- Waxa uu kordhin doonaa tirada seerayaasha xoolo-daaqeenka ah iyo kaydka abuurka shinida (Seed Banks) si loo helo noocyo calaf-xoolaad oo nafaqo leh una adkaysan kara isbedelka cimilada kuna haboon nafaqaynta xoolaha nool, kuwaas oo laga hirgelin doono gobalada Maroodijeex, Awdal iyo Saraar.
- Waxa uu diyaarin doonaa goobo lagu hayo, laguna naaxiyo xoolaha nool oo ay calaf, biyo iyo daawayn ay ka heli karaan.
- Waxa uu casriyayn doonaa nidaamka ka ganacsiga iyo suuqgaynta xoolaha, kormeerka iyo hubinta tayada xoolaha.
- Waxa uu dhisi doonaa saddex kawaan oo casri ah oo xoolaha lagu qalo, kuwaas oo laga dhisi doono Maroodijeex, Awdal iyo Sanaag si sare loogu qaado dhoofka hilibka xoolaha iyo hargaha. Waxa sidoo kale ballaadhin lagu samayn doona kawaannada ka dhisan Togdheer iyo Saaxil.
- Waxa uu samayn doonaa habraacyo iyo adeegyo baadhitaanka xoolaha ah, iyadoo lagu ilaalinayo bedqabka hilibka iyo caanaha si loo dhawro caafimaadka dadweynaha.



- Waxa la dhiirrigelin doonaa, korna loo qaadi doonaa awoodda aqooneed iyo khibradeed ee dadka soo saara calafka xoolaha, hilibka, caanaha, hargaha, saamaha iyo wax soosaarka kale ee xoolaha.
- Waxa uu sare u qaadi doonaa tirada, tayada iyo awoodda aqooneed ee dhakhaatiirta xoolaha nool iyo kalkaaliyeyaasha si loo xaqiijiyo helitaanka adeeg iyo daryeel caafimaad oo xoolaha nool lagu siiyo goob kasta.
- Waxa uu hirgelin doonaa barnaamijyada cilmi baadhista xoolaha, wax soo saarka xoolaha iyo kobcinta aqoonta xoolaha.




## Horumarinta Beeraha

Barnaamijka wax soo saarka beeraha oo ay fulisay Xukuumadda Xisbiga Kulmiye waa qeyb ka mid ah qorshaha qaranka ee cunto soosaarka dalka, iyadoo beeruhu dhaqaalaha dalka kaga jiraan kaalinta labaad marka laga yimaado xoolaha oo ah kaalinta koowaad, waxa ay boqolkiiba shan iyo sodon (**35%**) dadka Somaliland si toos ah ugu tiirsan yihiin wax soosaarka beeraha. Sidaa darteed, muddo xilleedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa awooda la saaray dhiirigelinta wax soosaarka khayraadka dalka oo ay beeruhu ugu horeeyaan.

### *Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:*

- *83% ayaa la korodhiyay miisaaniyada Wasaaradda Horumarinta Beeraha.*
- *Waxa la qoday **90** berkedood, **36** balli iyo **60** dhaamamka ciidda qabta.*
- *Waxa la sameeyay **2,994,413** lm oo ah xidh-xidhka (moosaska) beeraha.*
- *Waxa beeraleyda danyarta loo qoday **280,000** oo saacadood, waxa loo qeybiyay **178** mishiinada waraabka, tuubooyinka waraabka oo dhererkoodu gaadhayo **19,580m**, **151** guryo beereedka casriga ah (greenhouse), **10** cagaf iyo **15,700** oo qalabka beeraha (farm tools).*
- *Waxa la tabobaray **51,500** qof oo beeralay ah.*
- *Waxa **34** xarumood lagu kordhiyay goobaha saadaasha hawada oo ku kala yaal gobolada iyo degmooyinka dalka.*



**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** Isaga oo mudnaanta siinaya dhiirigelinta iyo horumarinta wax soosaarka beeraha, si loo gaadho isku filaasho cunto:

- Waxa uu dhisi doonaa shan goobood oo karantiina oo lagu hubiyo dawooyinka iyo abuurka (seeds) soo gala dalka.
- Waxa uu dhisi doonaa 10 waddo xagaaf ah (feeder roads) si loo horumariyo kaabayaasha iyo suuq-geynta wax soo saarka beeraha.
- Waxa uu kor u qaadi doonaa awoodda qabashada biyaha iyada oo la samayn doono moosaska beeraha, biyo-hakiyayaal iyo gabyanno, lagana hirgelin doono dhamaan gobolada dalka loona eegi doono baahida jirta.



- Waxa uu daadejin doonaa adeegga fidinta beeraha iyadoo laga sameyn doono 200 beer-tusaaleed (demo farms) dhamaan gobolada dalka.
- Waxa uu xoojin doonaa adeegsiga habka nidaamka casriga ah ee beerista iyada oo la adeegsanayo guri-beereed (green house) si wax soo saarka sare loogu qaado.
- Waxa uu beeraleyda dalka ku tababari doonaa hababka casriga ah ee loo isticmaalo biyaha waraabka iyada oo la adeegsanayo nidaamka dhibco-waraabiska (drip irrigation) iyo tamarta la cusboonaysiiyo gaar ahaan, tamarta cadceeda (solar system).

- Waxa uu xoojin doonaa habka waraabka leexinta biyaha dooxooyinka (spate irrigation) iyo kanaaladda taas oo kordhinaysa wax soo saarka beeraha gaar ahaan degmooyinka Beer, Oodweyne iyo Qabri-baxar.
- Waxa uu 100,000 oo qoys danyar ah ku taageeri doonaa saacadaha qodaalka, shinida, qalabka la dagaalanka cayayaanka, mishiinada waraabka.
- Waxa uu hagaajin doonaa kaabayaasha suuqyada sida bakhaarrada, kaydka, qaboojiyayaasha (cold chains) iyo qalabka kale ee muhiimka u ah kaydinta khudaarta iyo iibgaynta.



- Waxa uu abuuri doonaa nidaamka isku xidhka suuqa (value chain) ee beeralayda dalka, si looga ilaaliyo hoos u dhac, iyo khasaare ku yimaada guud ahaan qiimaha dalagyada dalka.
- Waxa uu joogtayn doonaa qabashada bandhig-sanadeed lagu soo bandhigi doono wax soo saarka beeraha si loo dhiiri-geliyo beeralayda iyo wax soosaarka dalka.
- Waxa uu samayn doonaa ururka guud ee beeralayda dalka iyo 150 iskaashato beeraley oo ka farcama iyada oo lagu tababari doono dhamaan farsamooyinka casriga ah ee beera-qodashada si wax soo saarka sare loogu qaado.
- Waxa uu kordhin doonaa dugsi-goobeedyada (farmer field schools) beeralayda tiro ahaan, iyo dugsiyada farsamada beeraha (agriculture technical schools).
- Waxa la joogtayn doonaa barnaamijyada la dagaalanka dulinka, cayayaanka beeraha iyo ayaxa.

- Waxa uu kor u qaadi doonaa aqoonta beeralayda iyada oo la siin doono tababarro la xidhiidha wax soosaarka, la dagaalanka dulinka iyo cudurada waxyeeleeya dalagga.
- Waxa lagu tababari doonaa beeralayda habka la qabsiga isbadalka cimilada iyo la socodka saadaasha hawada.
- Waxa la kordhin doonaa xarumaha saadaasha hawada tiro ahaan 45 xarumood.
- Waxa uu dhameystiri doonaa isla markaana hirgelin doonaa siyaasadaha iyo habraacyada lagu kobcinayo wax soosaarka dalka.
- Waxa uu samayn doonaa habraacyo lagu xoojinayo dhaqaalaynta ciidda iyo biyaha si loo yareeyo nabaad guurka ciidda.
- Waxa uu kor u qaadi doonaa wacyiga bulshada si loo dhiirigaliyo isticmaalka cuntada wadaniga iyada la adeegsanayo habab kala duwan oo wacyigalineed.
- Waxa uu xoojin doonaa barnaamijyada cilmi baadhista ee la xidhiidha kor u qaadista aqoonta iyo xirfadda beeralayda, casriyaynta beerashada iyo kobcinta wax soosaarka beeraha.



## Horumarinta Kalluumaysiga

Kalluumaysiga iyo ka faa'iidaysiga khayraadka baduhu, waxa uu ka mid yahay ilaha laf-dhabarta u ah dhaqaalaha Somaliland. Sidaa darteed, muddo xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye wax uu mudnaanta siiyay horumarinta iyo kobcinta kalluumaysiga.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- ***69%*** *ayaa la kordhiyay miisaaniyada Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Horumarinta Xeebaha*
- *Waxa laga dhisay magaalada Maydh deked kalluumaysi, dhismayaal xafiisyo ah iyo laba kalluun-kaydiye.*
- *Waxa la tabobaray* ***1840*** *kalluumeysato, waxana la soo iibiyay lix doonyood oo loogu talagalay tababarada.*
- *Waxa la qeybiyay* ***40*** *doonyood oo la gaadhsiiyay kallumeysatada Berbera iyo Seylac, waxa sidoo kale* ***50*** *mishiin oo nooca doonyaha la saaro ah, shabaakta kalluumaysiga iyo qalabkoodii oo dhameystiran ayaa loo qaybiyay kalluumaysatada dalka oo dhan.*
- *Waxa sideed degmo oo xeebaha ku yaala laga hirgeliyay xarumaha keydka iyo barafka si kor loogu qaaddo soo saarka iyo kaydinta kalluunka.*



**Xisbiga Kulmiye Muddo Xileedkiisa Saddexaad 2024-2029**, isaga oo mudnaanta siinaya horumarinta kalluumaysiga:

- Waxa uu balaadhin, casriyayn iyo dayactir ku samayn doonaa dekadaha kallumaysiga ee Berbera iyo Maydh.
- Waxa uu dhisi doonaa afar dekadood kalluumaysi oo cusub oo laga dhisi doono magaalooyinka Saylac, Lughaya, Xiis iyo Laas-qoray.
- Waxa uu casriyayn iyo tayayn ku samayn doonaa goobaha lagu kaydiyo kalluunka iyo baraf-dhaliyayaasha ee ku yaalla magaalooyinka Laasqoray, Xarshaw, Maydh, Xiis, Berbera, Bulloxaar, Lughaya iyo Seylac. Waxa sidoo kalena laga dhisi doona kuwo cusub magaalooyinka Ceel-daraad iyo Lawya-caddo.
- Waxa uu dhisi doonaa suuqyada kalluunka ee magaalooyinka Hargeysa, Boorama iyo Wajaale, iyada oo uu casriyayn iyo ballaadhin ku samayn doono suuqyada kalluunka ee magaalooyinka Cerigaabo iyo Burco.



- Waxa uu casriyayn doonaa nidaamka helidda iyo wadaagidda xogta kalluunka.
- Waxa uu fududayn doonaa ka ganacsiga kalluumaysiga. Sidoo kale, waxa uu xoojin doonaa nidaamka kormeerka iyo hubinta tayada kalluunka.
- Waxa uu kor u qaadi doonaa dadaalka helitaan ee suuqyo cusub oo loo iibgeeyo kalluunka dalka iyo khayraadka badda.
- Waxa uu ka samayn doonaa magaalada Berbera xarun lagu tababarro kalluumaystada si kor loogu qaado tayada aqoonta, xirfadda iyo bedqabka kalluumaysatada.

- Waxa uu kaabis iyo wax ka bedel ku samayn doonaa xeerarka iyo siyaasadaha kalluumaysiga si loo kobciyo, loo tayeeyo, loona casriyeeyo wax soosaarka kalluumaysiga dalka.
- Waxa uu xoojin doonaa awoodda hay'adaha dawladeed ee ka hor tagga kalluumaysiga sharci-darrada ah, iyo ku xadgudubka khayraadka badda iyada oo kor loo qaadayo awoodda nidaamka la socodka dhaqdhaqaaqa badda.
- Waxa uu xoojin doonaa ilaalinta xeebaha iyo goobaha badda ee kalluumaysiga ka caaggan, sida Sacaadadiin, Ceebaad, Rabshiga, Dhuftinle, iyada oo kuwo cusubna laga sahamin doono aaga tuulada Karin.
- Waxa uu xoojin doonaa habka gurmadka kalluumaysatada gaar ahaan xilliga xagaaga ee shilalka baddu dhacaan, iyada oo kor loo sii qaadi doono xidhiidhka wadashaqayneed ee Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Horumarinta Xeebaha iyo Ciidanka Ilaalada Xeebaha.
- Waxa uu daraasad iyo sahamin ku samayn doonaa khayraadka badda si loo ogaado xaddiga iyo noocyada kalluun ee badda ku jira.



## Horumarinta Maaliyadda

Tan iyo markii Xukuumadda Xisbiga Kulmiye ay xukunka qabatay, dhaqaalaha Somaliland waxa uu sameeyey koboc  la taaban karo kaas oo ay sabab u tahay xasiloonida dalka ka jirta, xoojinta maamul-wanaagga, tayaynta nidaamka maaliyadeed iyo dadaalka xukuumadda ee la xidhiidha samaynta ilo dhaqaale oo kala duwan oo kobciya dhaqaalaha.  iyada oo miisaaniyadda qaranku korodhay 33% taas oo kor u qaaday hirgelinta mashaariicda horumarineed ee dawladdu bulshada gaadhsiiso.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Qaadista talaabooyin lagu xoojinayo daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka maaliyadeed si looga hortago, loolana dagaalamo musuqmaasuqa iyo wax isdaba marinta.*
- *Waxa dib u habayn iyo casriyeyn lagu sameeyay habraacyada maaliyadeed ee dawladda, sidoo kale waxa horumar lagu sameeyay summadda xisaabaadka **(chart of accounts)** iyada oo la waafajiyay habraacyada iyo summadaha xisaabaadka ee caalamiga ah **(standardized chart of accounts).** Iyada la  hirgeliyay markii ugu horaysay halbeegyadda xisaabaadka caalamiga ah ee la isla waafaqsanyahay **(International Public Sector Accounting Standards (IPSAS).***
- *Waxa la  hirgeliyay nidaamka iswada ee maamulka xogta maaliyadda **(Somaliland financial management information system -SLFMIS)** iyo nidaamka e-payment ee cashuur qabashadda oo ka hortag weyn u ah in wax isdaba marin ahi dhacdo.*
- *Si loo fududeeyo cashuur bixinta, waxa la sameeyay madasha bixinta cashuuraha oo toos ah (**online tax portal**) taas oo suurto galisay in qofku isagoo goob iyo goor kasta oo uu joogo bixin kara cashuurta.*





**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** isaga oo mudnaanta siinaya horumarinta maaliyadda:

- Waxa uu dib u eegis iyo wax ka bedel ku samayn doonaa siyaasadaha haga dhaqaalaha guud ee dalka sidoo kale waxa uu dib u habayn ku samayn doonaa wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda ee jaangooya dhaqaalaha dalka.
- Waxa uu abuuri doonaa hay'adda dakhliga Somaliland (Somaliland Revenue Authority) si loo dardargaliyo loona kobciyo dakhliga dawladda.
- Waxa uu kordhin iyo kobcin ku samayn doonaa ilaha dhaqaalaha ee kor u qaadaya dakhliga dawladda, taas oo suurtogal ka dhigaysa in dawladdu kordhiso isla markaana tayayso adeegyada bulshada iyada oo awoodda la saarayo mashaariicda horumarineed oo kor u qaadaya adeegyada bulshada sida caafimaadka, waxbarashada, helista biyo nadiif ah, iyo daryeelka bulshada
- Waxa uu kordhin doonaa qoondada miisaaniyadeed ee hay'adaha wax soosaarka gaar ahaan xoolaha, beeraha iyo kalluumaysiga iyadoo lagu salaynayo mudnaanta qaranka, si loo horumariyo wax soosaarka gudaha iyo koritaanka dhaqaale ee dalka.
- Waxa uu dib u habayn iyo dib u eegis ku samayn doonaa tacriifadaha kala duwan, si loo dardar galiyo ganacsiga loona kobciyo dakhliga dalka.

- Waxa uu xoojin doona Sanduuqa Horumarinta Qaranka iyada oo loo samayn doono ilo dhaqaale oo ay iska kaashaadaan xukuumadda, ganacsatada iyo qaadhaan-bixiyayaasha.
- Waxa uu xoojin doonaa tallaabooyinka daah-furnaanta maaliyadeed ee xukuumadda iyo la dagaalanka musuqmaasuqa.
- Waxa uu sii wadi doonaa casriyaynta iyo dib u habaynta siyaasadaha iyo xeerarka lagu maamulo maaliyadda, si loo hubiyo in ay la jaanqaadayaan horumarka iyo baahiyaha dalka.
- Waxa uu manhajka waxbarasho dugsiyada hoose ilaa heer jaamacadeed ku dari doonaa aqoonta cashuuraha iyo cashuur bixinta, si loo kordhiyo aqoonta iyo fahanka bulshada ee la xidhiidha cashuurta.
- Waxa uu xoojin doonaa barnaamijyada wacyigelineed ee loo fidiyo bulshada gaar ahaan ganacsatada si kor loogu qaado fahamka iyo ogaalka bulshada ee cashuuraha.
- Waxa uu sii xoojin doonaa barnaamijyada cilmi baadhiseed ee la xidhiidha cashuuraha iyo maamulka maaliyadda, si loo xoojiyo aqoonta iyo xirfadaha la xidhiidha maaliyadda iyo cashuuraha dalka.

## Baananka iyo Hay'adaha Maaliyadda

Bangiyada iyo hay'adaha kale ee maaliyadu waxay door muuqda ah ka qaataan taabogelinta horumarinta dhaqaale ee umadi leedahay iyagoo bixiya adeegyo muhim u ah dardargelinta dhaqaallaha sida; bixinta amaahda, dhigashada lacagaha, samaynta fursadaha maalgashi, iyo maaraynta khatarta maaliyadeed.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Heerka sicir-bararka waxa lagu ilaaliyay in ka yar **10%.***
- *Waxa kor u kacay qiimaha shillinka Somaliland in ka badan **16%,** qiimihiisuna uu ahaa mid xasiloon lixdii sano ee u danbeeyay.*
- *Waxa Baanka Dhexe ku maalgaliyay **$51,477,075** mashaariicda dawladda dhexe iyo dawladaha hoose, sidoo kalena waxa uu siiyay dayn gaadhaysa **$15,563,500** shaqaalaha dawladda.*
- *Waxa la sameeyey xeerar iyo siyaasado dardargalinaya shaqada bangiyada iyo suuqa maaliyadda sida Xeerka Xawaaladaha, Xeerka ka Hortagga Maydhida Lacagaha, Xeerka Xaraashka, siyaasadda lacagta(**monetray policy**).*

**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** isaga oo mudnaanta siinaya horumarinta baananka iyo hay'adaha maaliyadda:

- Waxa uu dejin doonaa qorshayaal lagu dhiirigelinayo isticmaalka tiknoolojiyada maaliyadeed (fintech) si loo horumariyo adeegyada maaliyadeed ee dalka.
- Waxa uu sii wadi doonaa dhiirigelinta barnaamijyada lagu gaadhsiinayo adeegyada baananka iyo maaliyadda qaybaha kala duwan ee bulshada (financial inclusion) sida adeegsiga tiknoolajiyadda casriga ah, maalgalinta fudud, iyo wacyigalinta dadweynaha si kor loogu qaado dhaqaalaha qofeed.
- Waxa uu hirgelin doonaa barnaamijyo maalgalineed oo si gaar ah ugu fududeeya dabaqadda hoose ee bulshada helidda maalgalinta sida reer miyiga, beeraleyda, haweenka iyo dhalinyarta.
- Waxa uu dhammaystiri doonaa xeerarka, siyaasadaha iyo habraacyada lagama-maarmaanka u ah in baananka iyo suuqyada maaliyadda gaar ahaan bixinta daymaha, si loo dardar galiyo maalgelinta (Access to finance).



- Waxa uu abuuri doonaa Baanka Ganacsiga Somaliland (Commercial Bank of Somaliland) oo noqon doona Bangi dawladdu leedahay oo qabta dhamaan adeegyada maaliyadeed.
- Waxa uu awoodda saari doonaa in Baanka Dhexe ee Somaliland helo SWIFT Code si ay u fududaato la macaamilka bangiyada adduunka, dirista lacagaha dibedda, iyada oo ganacsatada loo fududayn doono helidda adeegyo LC (letter of credit) oo Somaliland leedahay.

- Waxa uu hirgelin doonaa nidaamka isku-xidhka maaliyadeed ee dalka (national payment switch), nidaamkaas oo sahlaya isku xidhka baananka iyo hay'adaha maaliyadeed ee dalka gudihiisa iyo dibadiisaba.
- Waxa uu abuuri doonaa suuqyada maaliyadeed ee raasamaalka (capital market) ee maalgelinta mashaariicda waawayn sida; waddooyinka, biriishyada iyo shirkadaha waawayn iyada oo la adeegsanayo hababka maaliyadeed ee Islaamiga ah (Islamic bonds) sida nooca loo yaqaan Sukuuk.
- Waxa uu sii wadi doonaa siyaasadda lacagta (monetary policy) oo dardar gelinaysa dhaqaalaha iyada oo mudnaan gaar ah la siin doono xoojinta adeegsiga shilinka Somaliland iyo kor u qaadista qiimahiisa.
- Waxa uu xoojin doonaa xidhiidhka baananka iyo hay'adaha maaliyadeed ee Somaliland la leeyihiin baananka dibadda iyo hay'adaha caalamiga ah ee ka shaqeeya maaliyadda.
- Waxa uu sameyn doonaa istaraatijiyad lagu xoojinayo xidhiidhka iyo iskaashiga Somaliland ay la leedahay ururrada caalamiga ah iyo kuwa gobolka sida Ururka Ganacsiga Adduunka (WTO), Hay'adda Lacagta Adduunka (IMF), Bangiga Adduunka (World Bank), Ururka Horumarinta Dhaqaalaha Bariga Afrika (EAC) iyo Ururrada Baananka Islaamka.

## Ganacsiga iyo Dalxiiska

Xisbiga Kulmiye isaga oo ogsoon in ganacsiga iyo dalxiisku ay ka mid yihiin tiirarka ugu waaweyn ee dhaqaajiya koboca dhaqaalaha, waxa uu qaaday tallaabooyin uu ku xoojinayo xidhiidhka ganacsi iyo dalxiiska ee Jamhuuriyadda Somaliland la leedahay caalamka.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Waxa la dhamaystiray kaabayaasha taageeraya koboca dhaqaalaha sida marin ganacsiyeedka Berbera iyo dhamaystirka aagga ka caaggan cashuuraha* ***(Berbera Economic Zone)*** *oo lagu sameeyay horumar balaadhan oo horseeday koboc dhaqaale.*
- *Waxa kor loo qaaday awoodda ganacsiga dhoofka iyada oo la gaadhsiiyay* ***$552,319,311 (2023),*** *halka ganacsiga dhoofku uu ahaa* ***$211,732,852 (2019).***
- *Waxa la yareeyay maalmaha ay ku qaadan jirtay nidaamka diiwaangelinta iyo liisan bixinta ganacsiga iyadoo hoos looga dhigay* ***15*** *maalmood, lagana dhigay hal maalin.*
- *Waxa dayactir balaadhan lagu sameeyay goobaha taariikhiga ah ee uu dalku leeyahay sida* ***Laasgeel, Dhagax-guurre, Qiblatayn (Saylac), Abbasa iyo Biyo Kulule.***




**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029, isaga oo mudnaanta siinaya horumarinta ganacsiga iyo dalxiiska:

- Waxa uu dhameystiri doonaa xeerarka iyo siyaasadaha kobcinaya dhaqaalaha iyo ganacsiga dalka.
- Waxa uu mudnaan siin doonaa kor u qaadista furfurnaanta ganacsiga guud si loo dardargaliyo dhaqdhaqaaqa ganacsi ee dalka.
- Waxa uu kor u qaadi doonaa dhiirigalinta iyo fududaynta ganacsiga isku-gudbinta badeecadaha sida adeegyada caymiska iyo bangiyada.
- Waxa uu sii wadi doonaa dhiiri galinta iyo fududeynta abuurista ganacsiga iyada oo xoogga la saari doono ganacsiyada cusub iyo horumarinta kuwii hore u jiray.
- Waxa uu abuuri doonaa nidaam fududeeya helidda iyo wadaagista macluumaadka iyo xogaha ganacsi (trade information portal).
- Waxa uu dhiirgelin doonaa heshiisyada ganacsi ee caalamiga ah ee dalalka deriska ah iyada oo la xalinayo caqabadaha horyaalla ganacsiga.
- Waxa uu xoogga saari doonaa horumarinta ganacsiga xuduudaha iyo aasaasida guddiyo isku dhaf ah oo kormeera fulinta iyo xallinta khilaafaadka ganacsiga xuduudaha.
- Waxa uu taageero dheeraad ah siin doonaa horumarinta iyo kobcinta xirfadaha haweenka ku jira ganacsiga, iyada oo loo sameyn doono barnaamijyo u gaar ah haweenka ganacsatada ah.

- Waxa mudnaan siin doonaa xoojinta iskaashiga ganacsi ee dawladda iyo ganacsatada si loo dhiirrigeliyo hal-abuurnimada ganacsi iyo dalxiiska.
- Waxa uu xoojin doonaa dedaalada lagu hormarinayo ganacsiga dalxiiska.
- Waxa uu kor u qaadi doonaa aqoonta iyo tababarada ganacsatada dhexe iyo kuwa yaryar.
- Waxa uu xoojin doonaa iskaashiga iyo wadashaqeynta ka dhaxaysa ganacsatada, iyada oo la abuuri doono jawi dhiirigalinaya iskaashi ganacsi oo u dhexeeya ganacsatada maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah.
- Waxa uu taageeri doonaa abuurista iyo jiritaanka ururrada ganacsiga, iyada oo la dhiirigelin doono ururrada ganacsiga ee u adeega ganacsatada si ay u helaan taageero iyo matalaad dhab ah.
- Waxa uu mudnaan siin doonaa abuurista barnaamijyo taageero u ah maalgelinta ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexe (micro, small & medium enterprises MSMEs), iyada oo loo marayo nidaamka dayminta iyo bixinta deeqo maaliyadeed si loo kordhiyo fursadaha shaqo abuurka iyo horumarinta ganacsiga.
- Waxa uu sii wadi doonaa cilmi-baadhisyo iyo daraasado la xidhiidha horumarinta ganacsiga iyo dalxiiska.

## Horumarinta Xabkaha iyo Faleenka

Somaliland waxay muddo dheer soo saareysay oo ay dhoofinaysay xabagta iyo faleenka ka soo baxa gobollada bariga gaar ahaan gobollada Sanaag iyo Saaxil. Xabagta iyo faleenka Waxa loo dhoofiyaa dalal ay kamid yihiin Sacuudiga, Imaaraadka Carabta, Cummaan, Kenya, Maraykanka, iyo waddamo ku yaal qaaradda Yurub.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Waxa la mideeyay cashuuraha ka ganacsiga iyo dhoofinta xabkaha iyo faleenka. Arrintani waxa ay yaraysay cashuuro badan uu ku dhici jiray xabkaha iyo faleenka.*
- *Waxa la dhiirigaliyay in la abuuro saddex warshadood oo wadanka gudihiisa ku warshadeeya xabkaha iyo faleenka si ay ugu dhoofin karaan suuqyada caalamiga ah.*
- *Waxa la diyaariyay qorshe horumarineed oo ku saabsan horumarinta nidaamka wax soosaar ee xabkaha iyo faleenka.*

**Xisbiga Kulmiye muddo-xilleedkiisa saddexaad 2024-2029,** isagoo mudnaan siinaya dhoofinta xabkaha iyo faleenka:

- Waxa uu xoojin doonaa kor u qaadista aqoonta ku saabsan farsamooyinka casriga ah ee beerashada iyo ururinta xabagta iyo faleenka.
- Waxa uu horumarin doonaa kaabayaasha dhaqaale sida waddooyinka iyo kaabayaasha kale ee sahlaya suuqgaynta xabkaha iyo faleenka.
- Waxa uu mudnaan gaar ah siin doonaa in la dhiso xarumo lagu kaydiyo laguna farsameeyo xabagta iyo faleenka si kor loogu qaado tayadooda.
- Waxa uu samayn doonaa barnaamij suuqgeyneed si loo kobciyo dhoofinta xabagta iyo faleenka ee suuqyada caalamiga ah.
- Waxa uu mudnaan siin doonaa dhamaystirka xeerarka iyo siyaasadaha

Fududeynaya ganacsiga iyo maalgashiga xabkaha iyo faleenka.



## Horumarinta Maalgashiga

Horumarinta maalgashigu waxa uu laf dhabar u yahay kobaca dhaqaalaha umadeed, gaar ahaan ka faa'iidaysiga kheyraadka dabiiciga ah, horumarinta qaybaha kala duwan ee wax soosaarka sidoo kale, kobcinta kaabayaasha dhaqaalaha (waddooyinka, dekedaha, iyo madaarada) helista tamar jaban, abuurista shaqooyin cusub, iyo kobcinta ilaha dhaqaalaha.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Fududaynta qaabka diiwaan galinta maalgashiga.*
- *Diyaarinta dhul loogu talo galay aagag warshadeed* ***(industarial zones)*** *oo laga hirgeliyay gobolada Maroodijeex, Awdal, Saaxil iyo Gabiley.*
- *Waxa la qaaday tallaabooyin lagu dardargalinayo soo jiidashada maalgashiga sida diyaarin hagaha maalgashiga oo qeexaya fursadaha maalgashi ee dalka.*
- *Waxa si joogta loo qabtaa carwada warshdaha ee sanadlaha ah si loo dhiirrigaliyo wax soo saarka dalka.*
- *Waxa la sameeyay, lana soo saaray daraasad guud oo koobsanaysa xogta warshadaha, waxtarkooda iyo caqabadaha haysta.*



**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** waxa uu sii wadi doonaa horumarinta maalgashiga Somaliland, iyada oo xoogga la saarayo arrimahan soo socda:

- Waxa uu dhamaystiri doonaa xeerarka iyo siyaasadaha aasaaska u ah horumarinta maalgashiga sida xeerka iyo siyaasadda wada-shaqaynta ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo dawladda (PPP); Xeerka iyo Siyaasadda Warshadaha; iyo kaabis iyo wax ka beddel lagu sameeyo Xeerka Maalgashiga si loo waafajiyo baahiyaha maalgashadayaasha gudaha iyo dibadda.
- Waxa uu hirgelin doonaa nidaam fududeeya diiwaangelinta maalgashiga iyada oo la samaynayo hal goob oo lagu diiwan galiyo (One stopshop) si meesha looga saaro caqabadaha maalgashatadu kala kulmaan bilaabista maalgashiga.




- Waxa uu abuuri doonaa bar/mareeg laga helo dhamaan xogta maalgashiga Somaliland (investment information portal) iyada oo lagu soo bandhigi doono afaf kala duwan.
- Waxa uu dardargalin doonaa dedaalada lagu xalinayo culaysyada iyo caqabadaha hor taagan maalgashiga sida; helista tamar qiimaheedu jaban yahay, helista dhul loogu talo galay maalgashiga iyo diyaarinta kaabayaasha dhaqaale ee taageera maalgashiga.
- Waxa uu kordhin doonaa dedaalada lagu soo jiidanayo indhaha maalgashadayaasha caalamiga ah si loo la wadaago xogta fursadaha maalgashi ee Somaliland iyada oo la adeegyanayo warbaahinta caalamka gaar ahaan baraha bulshada.

- Waxa uu kordhin doonaa dedaalada ay Somaliland kaga qayb galayso carwooyinka iyo shirarka caalamiga ah ee loogu talo galay maalgashiga si loo dardar galiyo xidhiidhada ururada caalamiga ee daneeya maalgashiga.
- Waxa uu sii wadi doonaa samaynta aagag warshadeed oo cusub si loo dhiirigaliyo maalgashiga iyo wax soo saarka dalka, iyada oo la horumarinayo kaabayaasha aagagga warshadeed, oo ay ku jiraan helitaanka tamar la isku halayn karo, biyo iyo isgaadhsiin.
- Waxa uu aasaasi doonaa waax garsoor oo u gaar ah arrimaha maalgashiga iyo xallinta khilaafaadka ganacsiga.
- Waxa uu xoojin doonaa siyaasadaha dhiirrigelinaya maalgashiga gudaha iyo ka caalamiga ah.
- Waxa uu sii wadi doonaa samaynta cilmibaadhisyo iyo diraasado la xidhiidha maalgashiga dalka gaar ahaan qaybaha wax soosaarka warshadaha, xoolaha, kalluunka, beeraha, macdanta iyo xabagta & faleenka si loo horumariyo dhaqaalaha dalka.
- Waxa uu u fududeyn doonaa helitaanka dalku-galka ee maalgashadayaasha iyo shaqaalaha ajnabiga ah ee xirfadda leh.
- Waxa uu maalgelin doonaa barnaamijyo tababar iyo horumarineed oo loogu talagalay shaqaalaha muwaadiniinta ah, si loogu diyaariyo in ay ka shaqeeyaan mashaariicaha maalgashi ee waaweyn.
- Waxa uu dhiirigelin doonaa maalgashiga mashaariicda cagaaran iyo kuwa waara (Green and Sustainable Investments) si loo soo jiito maalgashadayaasha xiiseeya mashaariicaha aan deegaanka dhib u lahayn.



## Horumarinta Kaabayaasha Dhaqaalaha

Xisbiga Kulmiye isaga oo maanka ku haya doorka kaabayaasha dhaqaaluhu ay u leeyihiin horumarinta dhaqaalaha dal soo koraya sida horumarinta jidadka, garoomada diyaaradaha, iyo dekedaha oo laf-dhabar u ah koboca dhaqaalaha gaar ahaan dhaqdhaqaaqa ganacsiga, gaadiidka iyo isku-socodka, iyo isku-xidhka umadeed, waxa uu mudnaan gaar ah siiyay horumarinta kaabayaasha dhaqaale.

## Jidadka

Horumarinta jidadku waxa ay laf-dhabar u yihiin kobaca dhaqaalaha umadeed, waxanay fududeeyaan isku-socodka hawlaha ganacsiga, isku-xidhka wax soosaarka iyo suuqyada, yaraynta kharashaadka isku socodka, kor u qaadista dalxiiska, soo jiidashada maalgashiga, abuurista fursado shaqo, iyo isku-xidhka gobollada dalka taas oo horumarinteeda iyo dayactirkeedu muhiimad gaar ah leeyahay.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Dhamaystirka **790km** oo waddooyinka cusub ah (**521km** oo laami ah, iyo **269km** oo carro tuul ah), **11** Biriish oo cusub, dhamaystirka **128** Buundooyinka biyo mareenka ah (culverts) iyo **167** oo ah nooca la yaqaan buundo-jiifta (irish bridge).*
- *Waxa la dayactiray wadooyin cabirkoodu dhan yahay **294km**.*
- *Waxa kale oo la sameeyay daraasado farsamo oo la xidhiidha waddooyin cusub oo cabirkoodu dhan yahay **334km**.*
- *Waxa la hirgeliyay shaybaadh loogu talo galay in lagu hubiyo tayada wadooyinka.*
- *Waxa wax-ka-bedel iyo casriyayn lagu sameeyay buugga dhaqdhaqaaqa Gaadiidka (circulation book) iyo sumadda gaadiidka dalka (plate numbers).*
- *Waxa la hirgeliyay qalab casri ah oo lagu xakameeyo xawaaraha gaadiidka.*
- *Si loo xakameeyo shilalka gaadiidka waxa kaabis iyo wax ka bedel lagu sameeyay xeerka waddomarista iyo nabadgelyada wadooyinka xeer lr 56/2013.*
- *Waxa la hirgeliyay nidaamka iyo goobaha baadhitaanka bedqabka gadiidka dalka.*

**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** waxa uu sii wadi doonaa dhisadda wadooyin cusub, dhamaystirka kuwa socda iyo dayactirka wadooyinka dhisan isaga oo mudnaanta siinaya wadooyinka soo socda:

- Waddada Lawyacaddo-Fardaha-Borama
- Waddada Hargeysa-Oodweyne-Burco

- Waddada Ceerigaabo - Maydh (Tabca)
- Waddada Ceerigaabo – Badhan.
- Waddada Borama- Baki .
- Waddada Arabsiyo – Allaybaday.
- Waddada Berbera - Laasciidle
- Waddada Hargeysa- Ina-guuxaa
- Waddada Hargeysa – Balligubadle
- Waddada Dhubato- Cadaadley
- Waddada Burco- War-cimraan.
- Waddada Hargeysa – Ceelsheekh (Dawga-cad).



**Xisbiga Kulmiye isaga oo ogsoon khasaaraha joogtada ah ee ka dhasha shilalka gaadiidka waxa uu:**

- Xoojin doonaa ku dhaqanka iyo fulinta shuruucda gaadiidka iyo wado-marista si loo xakameeyo shilalka gaadiidka.
- Xoojin doonaa hirgelinta caymiska gaadiidka, iyada oo la hubinayo in caymisku daboolayo khataraha shilalka iyo waxyeellada soo gaadha nafta iyo hantida.
- Xoojin doonaa naqshadeynta iyo dayactirka waddooyinka, iyadoo la siinayo mudnaanta koowaad horumarinta iyo ilaalinta tayada

- waddooyinka si loo hubiyo bedqabka dadka iyo hantidooda.
- Hirgelin doonaa in la iswaafajiyo isteerinka gaadiidka iyo haadka wadooyinka si loo yareeyo shilalka gaadiidka.
- Hirgelin doonaa habraac lagu xaddidayo cimriga gaadiidka dalka soo galaya.
- Hubin joogto ah ku sameyn doonaa bedqabka gaadiidka kala duwan, iyadoo la hubinayo in gaadiidku buuxiyey shuruudaha bedqabka.



- Hirgelin doonaa adeegsiga tiknoolajiyadda casriga ah si loo yareeyo loona xakameeyo shilalka gaadiidka, iyadoo la hirgelinayo qalab iyo nidaamyo tiknoolajiyeed oo lagu kormeero gaadiidka.
- Diyaarin doonaa tababaro kor loogu qaadayo aqoonta ciidanka nabadgelyada waddooyinka, iyadoo la siinayo tababaro casri ah oo ku saabsan maaraynta, ka hortagga shilalka iyo ilaalinta sharciyada waddooyinka.
- Sii xoojin doonaa barnaamijyada loogu talo galay in kor loogu qaado wacyiga bulshada ee la xidhiidha dhibaatada shilalka gaadiidka.
- Curin doonaa xeerka gaadiidka badda iyada oo la waafajinayo heerarka caalamiga ah ee gaadiidka badda.
- Casriyayn doonaa diiwaangalinta iyo sumadda gaadiidka badda si kor loo loogu qaado bedqabka gaadiidka badda.
- Joogtayn doonaa samaynta cilmibaadhisyo iyo diraasado la xidhiidha shilalka gaadiidka iyo xakamayntooda

## Garoomada Diyaaradaha

Xisbiga Kulmiye isaga oo ogsoon ahmiyada ay u leedahay caalamka goobta istaraatiijiga ah ee ay Jamhuuriyadda Somaliland ku taallo, waxa uu aaminsan yahay in garoomada loo diyaariyo in ay noqdaan xuddun (hub) isku xidha duulimaadyada caalamiga ah iyo kuwa iskaga gudbaya (transit), waxa uu mudnaan gaar ah siiyay horumarinta iyo casriyaynta garoomada diyaaradaha.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Xoojinta maamulka hawada Somaliland iyada oo la sameeyey, lana qalabeyey Xarunta Maamulka Hawada.*
- *Furitaanka Machadka Barashada Duulimaadyada ee Somaliland.*
- *Hirgelinta duulimaadyada gudaha si loo fududeeyo isku socodka dalka.*
- *Casriyaynta madaarka Hargeysa.*
- *Dib-u-dhiska iyo casriyaynta madaarka Berbera.*
- *Dayactirka iyo balaadhinta madaarada Burco, Ceerigaabo iyo Boorama,*
- *Dhisidda madaarka cusub ee Caynaba.*
- *Sahaminta madaarka Saylac ee deegaanka Tokhoshi.*



**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** isaga oo mudnaanta siinaya horumarinta Garoomada Diyaaradaha waxa uu hirgelin doonaa:

- Waxa uu samayn doonaa Shirkadda Diyaaradaha Somaliland.
- Waxa uu casriyayn doonaa madaarka Hargeysa iyada oo uu kordhin doono:
  - Dhabbo diyaaradeed oo labaad
  - Qalabka Hagista Diyaaradaha (instrument landing system).
  - Iftiiminta dhabbaha diyaaraduhu ka haadaan.
  - Xoojinta iyo casriyaynta Xarunta Hagista Diyaaradaha.
- Dhamaystirka dhabbada diyaaraddaha ee Madaarka Burco iyada oo la saarayo daamur loona dhamaystirayo qalabkiisa
- Dhismaha dhabbada diyaaraddaha ee Madaarka Boorama iyada oo la saarayo daamur loona dhamaystirayo qalabkiisa.
- Dhismaha dhabbada diyaaraddaha ee Madaarka Ceerigaabo iyada oo la saarayo daamur loona dhamaystirayo qalabkiisa
- Dhismaha garoon cusub oo laga dhisi doono Tokhoshi (degmada Saylac).

## Dekedaha

Xisbiga Kulmiye isaga oo og in Jamhuuriyadda Somaliland oo leh xeeb dhererkeedu ka badan yahay **850 km**, kuna taalla buqcad istraatiiji ah oo isku xidha Afrika, Bariga Dhexe iyo caalamka, waxa uu mudnaan gaar ah siiyay horumarinta dekedaha dalka, gaar ahaan dekedda caalamiga ah ee Berbera oo ku taalla marin biyoodka istiraatiijiga ah ee Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed. Muddo xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa lagu sameeyay casriyayn ballaadhan dekedda Berbera taas oo keentay in ay gasho kaalinta labaad tartanka dekedaha dalalka Afrika ee saxaaraha ka hooseeya (Sub Sahara Africa), kana mid noqoto **siddeeda** dekedood oo ugu saamaynta badan adduunka, sidoo kalena ay gasho kaalinta **106-aad** ee adeeg bixinta qiimaynta Baanka Adduunku ku sameeyay **405** Dekadood oo Caalamka ah.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Casriyaynta Dekadda Berbera oo la gaadhsiiyay dhererkeeda **1050m** joogeeduna hoos u qodan yahay **17m** loona yaqaan kaalka/draft.*
- *Waxa la dhisay barxad wayn oo bedkeedu dhan yahay **400m** taas oo qaadi karta kontaynarro tiradoodu gaadhayso **500,000** oo kontaynar.*

- *Waxa lagu soo kordhiyay sideed wiish oo qaada/raseeya kontaynarada la dhigayo barxada, iyo saddex wiish oo ah nooca casriga ah ee ka roga maraakiibta kontaynarada.*
- *Waxa la sameeyey faynuuska haga gaadiidka badda ee loo yaqaan (navigation aid).*
- *Waxa la soo kordhiyey doonida (pilot boat) qaadda shaqaalaha soo xidha maraakiibta iyo laba doonyood (tugboats) oo soo xidha maraakiibta.*
- *Waxa la dhisay dhuumo cusub oo casri ah oo qaada todobo nooc oo shidaal kala duwan ah (berbera fuel Jett) kuna soo xidhan karaan maraakiibta ugu waawayn ee shidaalka qaada (CBM).*

*Marka lays ku geeyo waxqabadkaasi waxay sabab u noqotay in awoodda adeeg-bixinta dekedda Berbera kor u kacdo* ***260%.***

**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** isaga oo mudnaanta siinaya horumarinta dekadaha:

- Waxa uu sii wadi doonaa casriyeynta iyo ballaadhinta dekedda caalamiga ah ee Berbera iyo xoojinta tartanka ay kula jirto dekedaha gobolka.
- Waxa uu dhisi doonaa terminal cusub oo lagu kordhinayo dekedda Berbera si kor loogu qaado awooddeeda.
- Waxa uu ku soo kordhin doonaa dooni saddexaad (tugboat) oo soo xidha maraakiibta oo ay dekedda Berbera yeelanayso.
- Waxa uu dhisi doonaa xarun weyn oo hagta maraakiibta (tower control) taas oo lagula socdo dhammaan maraakiibta ku soo xidhanaysa dekedda iyo kuwa maraya marin-biyoodka Jamhuuriyadda Somaliland (Somaliland territorial water) iyo aagga ganacsiga ee Somaliland (Somaliland economic zone).



- Waxa uu kordhin iyo tayayn ku samayn doonaa adeegyada ay dekedda Berberi u qabato maraakiibta adeegsanaysa biyaha gacanka cadmeed madaama ay dekedda Berbera ku taallo marin biyood muhiim u ah gaadiidka badda oo in ka badan 40% maraakiibta caalamka adeegsato.
- Waxa uu dhisi doonaa marso lagu dayactiro laguna hagaajiyo maraakiibta (dry dock), maraysa marinka Gacanka Cadmeed.
- Waxa uu balaadhin iyo casriyayn ku samayn doonaa dekedaha Saylac iyo Xiis.

## Tiknoolajiyadda iyo Hal-abuurka

Tiknoolajiyadda iyo hal-abuurku waxa ay dardar galiyaan koboca dhaqaalaha iyagoo fududeeya isku xidhka iyo dhaqdhaqaaqa ganacsiga oo abuura fursado cusub oo dhaqaalaha sare u qaada. Tiknoolajiyadda casriga ah, nidaamyada iswada, internet ka iyo shabakadaha isgaadhsiinta, iyo telefoonada gacantu waxa ay dardargalinayaan helitaanka iyo wadaagidda xogta taas oo fududaysa hal-abuurnimada, wax soosaarka iyo bixinta adeegyo qiimo leh. Tiknoolajiyadda iyo hal-abuurku waxa ay suurto galin karaan in la helo ilo dakhli oo cusub oo dhaliya badeecado dibedda loo dhoofin karo.



## Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:

- *Adeegsiga Xukuumadda ee Tiknoolajiyadda Casriga ah **(e-government)** oo ay imika in ka badan **40%** wasaaradaha iyo hay'adaha madaxabanaan ee dawladdu adeegsadaan sida; nidaamka **FMIS** ee lagu maamulo dakhliga iyo kharashka dawladda, nidaamka diiwaan galinta ganacsiga iyo nidaamka e-shillin oo shaqaalaha dawladda lagu siiyo mushaharka.*
- *Waxa la abuuray Xarunta Hal-abuurka Somaliland **(Somaliland Innovation Zone)** oo loogu talo galay in ay bixiso tabobaro la xadhiidha tiknoolajiyadda iyada oo lagu tabobaray ilaa **5000** qof oo isuga jira da'yarta jaamacadaha ka soo baxay, dadka daneeya tiknoolajiyadda, haweenka, dadka baahiyaha gaarka ah leh iyo dadka haya fikradaha hal'abuur ee tiknoolajiyadda, waxa kale oo ay xaruntu fududaysay hirgelinta ilaa **20** ganacsi oo cusub oo la xidhiidha tiknoolajiyadda.*
- *Waxa la hirgeliyay mareegta qaran ee lagu baahiyo xogta dawladda **(national portal)**, waxana la horumariyay korna loo qaaday awoodda adeegsiga tiknoolajiyaddeed ee xafiisyada dawladda.*
- *Waxa la mideeyay maamulka xadhiga kaybalka (Fiber Optic Cable) oo dawladda iyo sadexda shirkadood ee Telesom, SOMTEL iyo SOMCABLE ay ku midoobeen qaabka maalgashi ee loo yaqaan (PPP).*
- *Waxa markii ugu horaysay la hirgeliyay isku xidhka wacitaanka shirkadaha telefoonada (telecominterconnection).*
- *Waxa dalka ka hirgalay adeegga isgaadhsiinta 5G iyo u diyaargarowga adeegga 6G.*

**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** isaga oo mudnaanta siinaya horumarinta tiknoolajiyadda iyo hal-abuurka:

- Waxa uu dejin doonaa qorshayaal lagu dardar galinayo isbeddelka dhijitalka ah (digital transformation) ee dalka ka socda, si kor loogu qaado ka faa'iidaysiga tiknoolajiyadda, iyada oo la hirgelinayo barnaamijyo wacyigelineed oo la xidhiidha ka faa'iidaysiga tiknoolajiyadda casriga ah.
- Waxa uu dhiiri gelin doonaa shirkadaha yaryar iyo kuwa dhexe ee ka shaqeeya suuqa tiknoolajiyadda, iyada oo loo fududayn doono helitaanka deeqo iyo maalgelin, tababarro, iyo fursado suuq-geyn dalka gudihiisa iyo dibadaba.
- Waxa uu dhiirrigelin doonaa qabashada madallo la isku waydaarasado khibradda iyo waayo aragnimada tiknoolajiyadda si loo xoojiyo hal-abuurka iyo horumarinta tiknoolajiyadda.
- Waxa uu dejin doonaa xeerar iyo siyaasado lagu hago adeegsiga iyo ka faa'iidaysiga tiknoolajiyadda loona ilaaliyo mulkiyadda iyo xuquuqda lahaanshaha hal-abuurka tiknoolajiyadda.



- Waxa uu dejin doonaa barnaamijyo lagaga hortagayo saamaynta taban adeegsiga tiknoolaniyadda ku leedahay qiyamka islaamka, dhaqanka wanaagsan iyo wadajirka bulshada Somaliland.
- Waxa uu xoojin doonaa hirgelinta nidaamka iswada ee dawladda (e-government) si loo horumariyo, loo fududeeyo, loona tayeeyo adeegyada ay dowladda u fidiso dadweynaha.
- Waxa uu dhisi doonaa xarumo cusub oo hal-abuur iyadoo la xoojin doono kuwa hore u jiray, xarumahaas oo lagu taageeri doono hal-abuurka iyo ganacsi samaynta la xidhiidha tiknoolajiyadda.
- Waxa uu ku dari doona barashada tiknoolajiyada iyo hal-abuurka manhajka waxbarashada ee dalka.
- Waxa mudnaan siin doonaa abuurista barnaamijyo dhiirrigeliya cilmi baadhista, horumarinta tiknoolajiyadda iyo hal-abuurka si kor loogu qaado wax soo saarka tiknoolajiyadda.

## Macdanta, Shidaalka iyo Tamarta

Macdanta, shidaalka iyo tamartu waxa ay laf dhabar u yihiin horumarinta nolosha bulshada iyo koboca dhaqaalaha gaar ahaan ganacsiga, adeeg bixinta, wax soosaarka iyo warshadaynta. Sababtaas awgeed, himilada Xisbiga Kulmiye waxay ku qotontaa ka faa'iidaysiga khayraadka shidaalka iyo macdanta sidoo kale, helidda tamar qiimaheedu jaban yahay oo la isku halayn karo, deegankana aan wax yeelayn.

**Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:**

- *Qaadista tallaabooyin lagu horumarinayo ka faa'iidaysiga khayraadka dalka sida macdanta, shidaalka, iyo tamarta.*
- *Hirgelinta mashariicda Shidaalka oo ay ka mid yihiin: Sahaminta Shidaalka (Seismic Survey) ee shirkadda Rak Gas (2018), sahaminta Sahan Geology iyo Sahan Caro-seel ee shirkadaha Genel Energy iyo Rak Gas (2019).*
- *Waxa kor u kacay dhoofka macdanaha kala duwan ee dalka oo gaadhay ilaa* ***10,654 ton****.*
- *Waxa la aasaasay Shaybaadhka Macdanta (2023).*
- *Helidda qalabka sahaminta macdanta kaas oo ah qalabka baadhista macdanta dhulka hoostiisa (geophysical equipment) iyo (ground magnetometer).*
- *Helidda qalabka loo isticmaalo baadhista macdanta dalka*
- *Waxa la hirgaliyey shan mashruuc oo sahaminta macdanta dalka taas oo lagu ogaanayo xogta macdanta ee dalka.*



**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** waxa uu sii wadi doonaa horumarinta wax soosaarka macdanta, shidaalka iyo helista tamar jaban:

## Tamarta

- Waxa uu dib u eegis iyo kaabis ku samayn doonaa xeerka tamarta korontada somaliland (Somaliland Electrical Energy Act 2018).
- Waxa uu dardar galin doonaa sahaminta iyo baadhitaanka tamarta cusboonaata gaar ahaan tamarta kulka dhulka hoostiisa (geothermal energy).
- Waxa uu diyaarin doonaa siyaasado iyo habraacyo lagu maamulo adeeg bixinta shirkadaha korontada.
- Waxa uu kor u qaadi doonaa qaabka iyo nidaamyada iskaashiga suuqa korontada iyadoo la adeegsanayo xeerarka iyo hab-raacyada iskaashiga (PPP) si kor loogu qaado helitaanka koronto jaban loona kordhiyo awoodda korontadda.





- Waxa uu aasaasi doonaa xarunta baadhista tamarta la cusbooneysiin karo ee Somaliland (SLREC) si kor loogu qaado ka faa'iidaysiga tignoolajiyada tamarta la cusboonaysiin karo.
- Waxa uu u hawl gali doonaa in qiimaha korontada dalka hoos loo dhigo ilaa 50% si loo helo koronto jaban.
- Waxa uu u hawl gali doonaa in 30% ka mid ah tamarta dalka lagu adeegsado laga dhaliyo ilaha tamarta cusboonaata.

## Macdanta iyo Shidaalka

- Waxa uu nidaamin doonaa, isla markaana diiwan galin doonaa garabraratada (macdan qodata yaryar) macdanta ka shaqaysata si loo horumariyo wax soosaarka macdanta dalka.
- Waxa uu u hawl gali doonaa kobcinta wax soo saarka iyo dhoofinta macdanta dalka si loo kordhiyo dakhliga guud ee dalka.
- Waxa uu xaqiijin doonaa in himilada soo saarista khayraadka shidaalka ee dalka ay dhamaystiranto shanta sano ee socota.
- Waxa uu xoogga saari doonaa qabanqaabinta madallo lagu soo bandhigayo xogta shidaalka dalka (bidding round) si loo xoojiyo soo jiidashada maalgashiga shidaalka.
- Waxa uu sii wadi doonaa samaynta cilmibaadhisyo iyo daraasado fududeeya sahaminta noocyada macdanta iyo goobaha ay ku jiraan si kor loogu qaado ka faa'iidaysiga khayraadka macdanta dalka.

## Maaraynta Deeqaha Caalamiga ah

Maamulidda iyo isku dubaridka deeqaha, gargaarka iyo in xidhiidh wanaagsan lala yeesho hay'adaha aan dowliga ahayn iyo qaadhaan-bixiyeyaasha waxa ay lafdhabar u tahay ka faa'iidaysiga deeqaha iyo caawimooyinka. Xisbiga Kulmiye waxa uu ahmiyad dheeraad siiyay isku dubaridka deeqaha iyo xidhiidhka qaadhaan bixiyayaasha oo isugu jira hay'adaha aan dowliga ahayn, iyo qaadhaan-bixiyeyaasha caalamiga ah.

### Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:

- *Waxa la diyaariyey Qorshaha Horumarinta Qaranka ee **3aad** (NDPIII) kaasi oo uu hagayo hiigsiga qaran ee 2030.*
- *Waxa la kormeeray **124** mashruuc oo isugu jira mashaariic ay fuliyeen hay'adaha dawliga ah, hay'adaha Qaramada Midoobey, iyo hay'adaha caalamiga ah.*
- *Waxa la hirgeliyay nidaam xisaabeed daahfuran oo lagu maamulo deeqaha iyo qaadhaanada dalka soo gaadha taas oo kordhisay kalsoonida lagu qabo nidaamka maamul iyo xisaabeed ee Somaliland.*
- *Waxa la xoojiyay xidhiidhka wada-shaqayneed ee dawladda iyo hay'adaha caalamiga ah.*

**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** isaga oo mudnaanta siinaya xoojinta maaraynta deeqaha caalamiga ah iyo xidhiidh fiican oo lala yeesho qaadhaan-bixiyayaasha:

- Waxa uu hirgelin doonaa qorshayaal lagu midaynayo mashaariicda ay qaadhaan bixiyayaashu maalgeliyaan.

- Waxa uu xoojin doonaa xidhiidhka ay Somaliland la leedahay qaadhaan bixiyayaasha iyo hay'adaha caalamiga ah iyada oo la xoojinayo iskaashiga hay'adaha dawladda, qaadhaan bixiyeyaasha caalamiga ah, hay'adaha aan dawliga ahayn, iyo daneeyayaasha kale.
- Waxa uu samayn doonaa barnaamijyo lagu hubinayo in mashaariicda laga maalgaliyo deeqaha caalamiga ah ay daboolayaan baahiyaha mudnaanta leh ee qaranka, isla markaana ay la jaanqadayaan qorshayaasha qaranka.
- Waxa uu diyaarin doonaa mashaariic waawayn (flagship projects) oo maalgalin looga diyaariyo qaadhaan bixiyayaasha qaab waafaqsan Qorshaha Horumarinta Qaranka.




- Waxa uu xoojin doonaa wadashaqaynta iyo isku-xidhka wasaaradaha iyo hay'adaha ka shaqeeya mashaariicda ay qaadhaan bixiyayaashu maalgaliyaan.
- Waxa uu xoojin doonaa awoodda hawl-qabad ee Xafiiska Istaatistikada qaranka oo shaqadiisu tahay ururinta iyo maaraynta xogta dalka.
- Waxa uu xoojin doonaa adeegsiga tiknoolajiyadda ee ururinta xogta iyo guud ahaan maaraynta deeqaha caalamiga ah.
- Waxa uu xoojin doonaa dabagalka iyo kormeerka joogtada ah ee lagu hubinayo wax qabadka mashaariicda laga maalgaliyo deeqaha caalamiga ah.



# 4

# TIIRKA 4aad

# ADEEGA BULSHADA

# Adeegga Bulshada

Xisbiga Kulmiye waxa uu aaminsan yahay in bixinta adeegyo iyo daryeel bulsheed oo loo siman yahay, kuna qotonta adeeg-bixin hufan oo waxtar u leh nolosha bulshada gaar ahaan danyarta oo ay fidiyaan laamaha dawladda ay lafdhabar u tahay horumarinta adeegyada bulshada gaar ahaan waxbarashada, caafimaadka, biyaha, daryeelka bulshada, taageerista danyarta iyo dadka baahiyaha gaarka leh.

## Barashada iyo ku Dhaqanka Diinta

Xisbiga Kulmiye muddadii uu xukunka hayay waxa uu si gaar ah mudnaan u siiyay xoojinta iyo kor u qaadidda arrimaha diinta iyo dhawrista dhaqanka wanaagsan.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Waxa la xoojiyay tartamada Qur'aanka si loo dhiirigeliyo da'yarta barata kitaabka Qur'aanka kariimka ah iyo xifdigiisa.*
- *Waxa la diiwaan geliyey **2,441** madaarasado Quraanka.*
- *Waxa la tababaray **2,450** qof oo isugu jira macallimiin iyo ducaad.*
- *Waxa la diiwaangeliyey **2,211** oo masjid.*
- *Waxa si joogto ah loo dhiiri galiyay, duruusta, xalqadaha iyo casharada joogtada ah ee lagu qabto masaajiddada.*



**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** isaga oo mudnaanta siinaya adkaynta barashada iyo ku dhaqanka diinta:

- Waxa uu xoojin doonaa dhiirigalinta xifdiga Qur'aanka Kariimka ah iyo barashada culuumtiisa iyada oo la sii dardargalin doono tartamada quraanka ee kala duwan, si gaar ahna awoodda loo saari doono tartanka hablaha ee xifdiga Quraanka Kariimka ah.
- Waxa uu kordhin doonaa barnaamijyo kor u qaadaya qiyamka islaamka iyo akhlaaqda wanaagsan ee bulshada dhexdeeda.



- Waxa uu dardargalin doonaa barnaamijyada xoojinaya fikirka dhexdhexaadnimada (الوسطية والاعتدال) ee diiniga ah isla markaana yaraynaya xagjirnimada.
- Waxa uu xoojin doona la dagaalanka anshax-xumada, fisqiga, iyo macsida.
- Waxa uu dejin doonaa istraatiijiyado lagu horumarinayo maamulka iyo maaraynta awqaafta dalka.
- Waxa uu curin doonaa xeerka maamulka cilaajyada, xeerka waqfiga, iyo Xeerka Diiwaanka Sakada.
- Waxa uu sii wadi doonaa xoojinta adeegbixinta waxbarashada diiniga ah gaar ahaan malcaamadaha, madarasadaha iyo macaa'hida diiniga ah.
- Waxa uu xoojin doonaa dhisidda dugsiyo Qur'aan oo laga dhisi doono gobollada dalka iyada oo loo eegayo baahida jirta si Qur'aanka Kariimka ah ay uga bartaan dadka aan awoodin lacagta madarasadaha.

- Waxa uu xoojin doona barnaamijyo lagu tababarayo culimada iyo ducaadda hababka dacwadda loogu adeegsanayo warbaahinta casriga ah.
- Waxa uu xoojin doonaa u adeegsiga tignoolajiyada casriga ah ee dacwadda iyo gudbinta culuumta diiniga ah.
- Waxa uu hirgelin doonaa nidaam lagu maareeyo xogta masaajidda, dugsiyada qur'aanka kariimka ah, machadyada shareecada, cilaajyada iyo awqaafta dalka.
- Waxa uu xoojin doonaa xidhiidhka iskaashi ee ka dhexeeya hay'adaha maamula camalka khayriga ah.
- Waxa uu hirgelin doonaa manhajka ay dhigaan macaahidda shareecadu iyo midaynta shahaadooyinka ay bixiyaan macaahiddu.
- Waxa uu samayn doonaa xarun u gaar ah tababarka, kobcinta aqoonta iyo xirfadda ardayda kaalmaha hore ka gala tartamada Quraanka Kariimka.

## Horumarinta Adeegyada Bulshada

Xisbiga Kulmiye waxa uu si xoog leh wax uga qabtay, ahmiyad dheeraad ahna siiyay tayaynta, taabo-gelinta iyo fidinta adeegyada bulshada, si loo helo bulsho ka horumarsan dhinacyada waxbarashada, caafimaadka, khayraadka biyaha iyo fayo-dhawrkooda, kor u qaadista daryeelka bulshada, kobcinta kaalinta dhalinyarada iyo xoojinta ciyaaraha.

## Waxbarashada

Waxbarashadu waa halka ay ka unkanto curinta iyo hal-abuur kasta oo uu sameeyo qof, bulsho ama dal. Sababtaas awgeed, Xisbiga kulmiye waxa uu aaminsan yahay in dadaal, dhaqaale iyo tamar badan oo la geliyo adeegbixinta waxbarashada ay lagama maarmaan u tahay si loo xaqiijiyo, hirgelinta nidaam waxbarasho oo horumarsan.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- ***93%** waxa la kordhiyay miisaaniyada adeegbixinta waxbarashada.*
- *Waxa la dhamastiray barnaamijka waxqorista iyo waxakhriska ee dadka waawayn.*
- *Waxa dib loo qaabeeyay dugsiyada waxbarashada oo badankooda laga dhigay goobo dhismahooodu ku haboon ardayda naafada ah.*
- *Waxa la kordhiyay gunnada macallimiinta dugsiyada goobaha miyiga ah.*
- *Waxa uu dayactir ku sameeyay dugsiyada dalka sidoo kale waxa uu ku kordhiyay dhismayaal cusub oo gaadhaya **1,213** dugsi taas oo ka dhigan in **135%** la kordhiyay, korna loo qaaday tirada iyo tayada dhismayaasha dugsiyada dalka.*


- *Waxa dib loo qaabeeyay, lana soo daabacay buugaagta manhajka waxbarashada ee dugsiyada dalka oo dhan, laguna qaybiyay lacag la'aan.*
- *Waxa la tababaray **3,500** macallin.*
- *Waxa ballaadhin iyo casriyey lagu sameeyey Machadka Tababarka Macalimiinta Hargeysa.*
- *Waxa dib u dhis dhamaystiran lagu sameeyay machadka farsamada gacanta (Technical Institute) ee Hargeysa iyo ka Burco.*

**Xisbiga Kulmiye muddo-xilleedkiisa saddexaad 2024-2029,** isagoo ka duullaya in la gaadho hiraalka ah tayaynta waxbarashada ee halbeegaa 1:30 (halkii macallinba inuu ku beegmo 30 arday) iyo ka dhabaynta horumarinta adeega-bixinta waxbarashada dalka, waxa uu fulinayaa arrimahan:



- Waxa uu dhisi doonaa 150 dugsi hoose/dhexe, waxana uu ku dadaali doonaa in ay yeeshaan garoomada ciyaaraha kala duwan, halka dayactir, casriyayn iyo balaadhin lagu samayn doono dugsiyadii hore u jiray ee gobolada dalka oo dhan.
- Waxa uu dhisi doonaa 50 dugsi sare oo cusub oo laga hirgelin doono dhamaan gobollada dalka iyada oo loo eegi doono baahiyaha jira.
- Waxa uu hirgelin doonaa shan dugsiyada waxbarashada dhaqaalaha qoyska (Flecs) iyo waxbarashada dadka waawayn ah (Adult education), si loo xaqiijiyo in dumarku fursad dheeraad ah u helaan waxbarasho u gaar ah iyo xirfado kala duwan oo ay ku shaqaystaan.

- Waxa uu 25% kordhinayaa mushaharka barayaasha dugsiyada waxbarashada dalka, si ay qayb xooggan uga qaadato kor u qaadida nolosha iyo daryeelka barayaasha oo tiir-dhexaad u ah qorshaha tayaynta adeeg-bixinta waxbarashada aasaasiga ah ee dalka.
- Waxa uu shaqaalayn doonaa 500 macalin oo cusub oo aqoon u leh manhajka waxbarashada dugsiyada oo 50% ay dumar yihiin.
- 3,000 oo macallin oo ku meelgaadh ayaa la marin doonaa hanaanka shaqaalaysiinta qaranka, si ay u helaan xaquuqaha shaqaalanimo ee rasmiga ah.
- Waxa uu dhisayaa machadka tababarka macallimiinta ee gobollada bariga, iyadoo casriyeyn lagu samaynayo machadka tababarka macallimiinta ee gobolada galbeedka ee imika jira.
- Waxa uu tababar siin doonaa 7,000 oo macallin, iyadoo la gaadhsiinayo aqoontooda heer jaamacadeed.



- Waxa uu ahmiyad dheeraad ah siin doonaa isticmaalka tiknoolajiyada casriga ah ee dugsiyada dalka, si loo xoojiyo habka adeega-bixinta waxbarashada, nidaamka keydinta xogta iyo helista warbixinaha waxbarashada ee dalka guud ahaan.
- Waxa uu casriyayn ku samayn doonaa manhajka waxbarashada dalka isaga oo ku dari doona culuumta tiknoolajiyadda si ardayda Jamhuuriyadda Somaliland loogu diyaariyo la jaanqaadidda iyo barashada xirfadaha casriga ah ee dunidu ku tallaabsatay.
- Waxa uu u qaabayn doonaa manhajka dalka inuu noqdo mid elekrooni ah (digital format) iyada oo la adeegsanayo tiknoolajiyadda casriga ah si ay ardaydu u helaan buugaagta iyo casharada oo loo duubay hab maqal iyo muuqaal ah lana gaadhsiin karo dugsiyada ku yaal deegaamada ay macallimiintu ku yaryihiin.



- Waxa uu aasaasayaa guddida hirgelinta tayada waxbarashada si loola socdo heerka tayada waxbarashada ee la hiigsanayo.
- Waxa uu curin doonaa siyaasadda illaalinta tayada xirfadaha farsamada gacanta iyo hagayaal jaangoynaya xirfadaha farsamada gacanta ee ugu mudan ahna kuwo iibgal ah loogana baahan yahay bulshada dhexdeeda.
- Waxa uu dibu-eegis, kaabis iyo midayn ku samaynayaa manhajka aasaasiga ah ee xirfadaha farsamada gacanta.
- Waxa uu ka hirgelin doonaa gobollada Awdal, Sanaag iyo Sool dugsiyo farsamada gacanta ah oo cusub.
- Waxa uu kor u qaadayaa awoodda adeeg bixinta ee xarumaha xirfadsiinta dhalinyarada ee ka jira dhamaan gobollada dalka.
- Waxa uu casriyayn iyo balaadhin ku samayn doonaa laamaha cilmibaadhista iyo daraasaadka ee wasaaradda waxbarashada, si loo tayeeyo waxbarashada dalka.
- Waxa uu xoojin doonaa hirgelinta siyaasadda maamulka iyo habaynta manhajka dugsiyada gaarka loo leeyahay, si loo waafajiyo manhajka aasaasiga ah ee waxbarashada.

- Waxa uu ahmiyad gaar ah siinayaa sii wadista iyo xoojinta nidaamka maamul-daadajinta waxbarashada.
- Waxa uu dib u eegis ku samaynayaa hababka waddaniyeynta iyo dal-jacaylka ee ku jira manhajka aasaasiga ah ee waxbarashada.



- Waxa uu daraasad ku samayn doonaa waxbarashada reer miyiga/reer guuraaga, si ay u iba-bixiso qorshe da'yarta xoolo-raacatada ahi ku hesho adeegbixin waxbarasho oo noloshooda reer guuraanimo ku haboon.
- Waxa uu dib u qiimayn ku samayn doonaa siyaasaadaha iyo hababka adeeg bixinta waxbarasho ku haboon duruufaha iyo baahiyaha gaarka ah dadka la nool sida; naafada, agoomaha, haweenka iyo dadka u nugul duruufaha dhaqan-dhaqaale.
- Waxa uu xoojin doonaa halbeegyada iyo hagayaasha loogu talo galay qiimaynta tayada waxbarashada si loogu dabagalo loona hubiyo tayada dhammaan xarumaha waxbarashada dalka.
- Waxa uu ka hirgelin doona dhammaan dugsiyada waxbarasho ee dalka adeegga caafimaadka ee degdeg ah.
- Waxa la sii wadi doonaa buugaagta manhajka waxbarashada ee loo qaybiyo arday dugsiyada dalka.
- Waxa uu xoojin iyo tayayn ku samayn doonaa maaddada barashada diinta islaamka ee ku jirta manhajka waxbarashada.

## Tacliinta Sare

Tacliinta sare waxay door muhiim ah ka ciyaartaa horumarka dhaqan-dhaqaale ee bulsho, iyada oo soo saarta aqoonyahano xirfad sare u leh dhinacyada kala duwan ee nolosha. Jaamacaduhu waxa ay soo saaran dad samayn kara cilmi-baadhisyo, hal-abuurnimo iyo curin aqooneed, xallin kara dhibaatooyinka haysta bulshooyinka isla markaana ku hagi kara dhinaca horumar waara. Waxa ay sidoo kale fududeeyaan aqoon is-waydaarsiga, iyo qabashada dood cilmiyeedyada si kor loogu qaado wayciga iyo ogaalka bulshada, sidoo kale iswaafajin lagu sameeyo manhajka jaamacadaha iyo baahida shaqo ee suuqu waa furaha horumar dal gaadho.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Waxa la kordhiyay miisaaniyadda tacliinta sare **70%.***
- *Waxa sare u kacday tirada ardayda wax ka barata goobaha tacliinta sare oo 2017 ahayd **15,000,** halka ay imika tiradoodu ka tahay **38,791** arday.*
- *Waxa **100%** la kordhiyay deeqa waxbarasho ee ay bixiyaan jamacadaha dalku.*
- *Waxa **100%** la kordhiyay ardayda danyarta ah ee xafiiska tacliinta sare ka bixiyo waxbarashada jaamacadaha dalka.*
- *Waxa deeq waxbarasho heer jaamacadeed ah loo diray dalka debediisa arday dhan **561 arday.***



**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** waxa uu mudnaanta siinayaa horumarinta tacliinta sare:

- Waxa uu dib u eegis ku samayn doonaa siyaasadaha, hagayaasha iyo halbeegyada lagu maamulo hay'adaha tacliinta sarre.
- Waxa uu tayayn doonaa Guddida Tacliinta Sare isla markaana kordhin doonaa qoondada ay guddidu ku leedahay miisaaniyadda qaranka.
- Waxa uu xoojin doonaa awoodda guddida ee nidaaminta, hagidda, hubinta tayada waxbarashada iyo dabagalka jaamacadaha iyo kulliyadaha bixiya waxbarashada tacliinta sare.
- Waxa uu dejin doonaa istaraatiijiyad la isku waafajinayo manhajka jaamacadaha iyo baahiyaha aqooneed/xirfadeed ee suuqa shaqada.
- Waxa uu xoojin doonaa horumarinta cilmibaadhista, hal-abuurka iyo curinta aqoonta.
- Waxa uu dejin doonaa istraatiijiyad hagta adeegsiga tiknoolajiyadda casriga ah ee maamulidda, cashar bixinta, wadaagidda xogta tacliinta sare.
- Waxa uu xoojin doonaa qorshayaal dadka danyarta ah iyo dadka nuguli ku helaan deeqaha waxbarashada tacliinta sare.
- Waxa uu diyaarin doonaa qorshayaal lagu tababarayo macalimiinta jaamacadaha.
- Waxa uu hirgelin doonaa cilmibaadhisyo iyo daraasado lagu horumarinayo tacliinta sare ee dalka, laguna xalinayo caqabadaha haysta tacliinta sare.



## Caafimaadka:

In la helo adeeg-bixin iyo daryeel caafimaad oo tayo sare leh, waxay muhiim u tahay yaraynta cudurada, kor u qaadista daryeelka caafimaadka iyo gaadhista bulsho horumarsan oo ka bedqabta dhinac kasta.



***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- ***17 Cusbitaal** oo waawayn ayaa laga dhisay dhamaan gobolada dalka oo ka dhigan in **100%** la kordhiyay tirade cusbitaalada.*
- *Waxa la dhisay **152** xarumaha hooyada iyo dhallaanka ah kuwaasi oo laga dhisay degmooyinka dalka taas oo u dhiganta in **117%** la kordhiyay.*
- *Gaadiidka gurmadka caafimaadka waxa lagu kordhiyey tiro dhan **77 gaadhi (Ambulance).***
- ***348** dhakhaatiir ah iyo **1,121** xubnood oo isugu jira kalkaaliyaal caafimaad, umulisooyin iyo shaqaale hoosaad ayaa laga hawlgeliyay goobaha adeegbixinta caafimaadka ee guud ahaan dalka oo u dhiganta **197%** in ay korodhay helista adeeg-bixinta caafimaadka ee goobaha dawliga ah.*
- *Waxa markii ugu horaysay cusbitaalka guud ee Hargeysa laga hirgeliyay qaybta baadhista kansarka **(oncology)** iyo qaybta Pathology-ga, qaybta sifaynta kelyaha ayaa laga hirgeliyay cusbitaalada Burco iyo Borama.*

- *Waxa dhismaheeda la dhamaystiray xarunta shaybaadhka qaranka si loola socdo dhamaan xanuunada faafa iyo kuwa aan faafin.*
- *Waxa la gaadhsiiyey cusbitaalada gobollada Maroodijeex, Saaxil, Awdal, Togdheer, Sanaag iyo Sool mishiinada dhaliya Oxygen-ta.*
- *Waxa la dhisay xarunta qaranka ee gurmadka degdegga ah (Public Health Emergency Operations Center – PHEOC).*
- *Waxa dhammaan cusbitaalada dalka lagu qalabeeyay agabka iyo qalabka baadhista oo ay ka mid yihiin mishiinada PCR-ka ee lagu baadho hiddo-side (DNA).*
- *Waxa cisbitaalka Burco lagu rakibay mishiinka CT-scan.*
- *Iyada oo laga duulayo nidaamka isku tashiga qaranka waxa kor loo qaaday daaweynta iyo daryeelka bukaanka maanka oo lacag la'aan ah.*



**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** waxa uu mudnaanta siinayaa gaadhista iyo hirgelinta adeeg-bixin iyo daryeel caafimaad oo tayo leh, lana jaanqaadaya adeeg-bixinta daryeelka caafimaadka geeska afrika ugu fiican. Si taas loo gaadho, xisbiga kulmiye waxa uu fulinayaa hawlahan:

- Waxa uu dhaqangelin doonaa siyaasadda caafimaadka ee heer qaran (National Health Policy) si loo hubiyo tayada adeeg bixinta goobaha caafimaadka.
- Waxa uu dhisi doonaa 10 cusbitaal oo cusub oo casri ah iyadoo ballaadhin, qalabayn iyo casriyayn lagu samayn doono cusbitaaladii hore u jiray.

- Waxa uu dhisi doonaa 100 xarumaha daryeelka hooyada iyo dhallaanka ah (MCHs) si adeega caafimaadka asaasiga ahi u gaadho goobaha fogfog ee aanu hore u gaadhin.
- Waxa uu xoojin doonaa barnaamijka maamul-daadajinta adeeg-bixinta caafimaadka ee dalka.
- Waxa uu hirgelin doonaa 3 xarumood oo bixiya adeegga caafimaadka degdegga ah (Public Health Emergency Operation Centers) si gurmad daryeel caafimaad oo degdeg ah loo gaadhsiin karo goob kasta oo dalka ka mid ah.
- Waxa uu hirgelin doonaa xarumo ku dhex yaalla cusbitaalada gobollada oo u gaar ah talo-bixinta iyo daaweynta cudurada aan faafin (non-communicable diseases) sida dhiigkarka, macaanka, kansarka, wadno-xanuunka iyo cudurada kale ee ay isku haybta yihiin.




- Waxa uu siyaasad iyo qorshe cad u samayn doonaa ka hortagga, maaraynta iyo la-dagaalanka cudurrada la isku-gudbiyo, faafa iyo kuwa safmarka ah (communicable, epidemic and pandemic diseases).
- Waxa uu shaqaalayn doonaa 1,500 oo isugu jira dhakhaatiir, kaalkaaliyayaal caafimaad iyo shaqaale hoosaad, halka 3,000 oo shaqaale mihnadlayaal caafimaad iyo shaqaale hoosaad ku meel gaadh ahna la marin doono nidaamka shaqaalaynsiinta ee qaranka.
- Waxa uu kor u qaadayaa tayada mihnadlayaasha caafimaadka iyo guud ahaan cududda shaqaalaha caafimaadka, iyadoo la siin doono tababaro joogto ah iyo takhasusaad dheeraada dalka gudihiisa iyo dibeddiisa.
- Waxa uu ahmiyad dheeraad ah siin doonaa kor u qaadista tirada iyo tayada adeeg-bixinta gaadiidka gurmadka caafimaadka (Ambulances services).

- Waxa uu dejin doonaa siyaasado, hab-raacyo iyo hagayaal lagula socdo tayada dawada, iyo hababka loo kaydiyo, iyadoo la xoojinayo awoodda hay'adaha ku shaqada leh ilaalinta tayada daawooyinka.
- Waxa uu xoojin doonaa sahanka tirada iyo xogta caafimaadka (Demographic and Health Surveys) ee dalka oo dhan, iyadoo la adeegsanayo tiknoolajiyada casriga ah.
- Waxa uu dib u habayn iyo casriyayn ku samayn doonaa nidaamka bixinta liisamada goobaha caafimaadka iyo la socodka adeeg bixinta caafimaadka guud ee dalka.
- Waxa uu xoojin doonaa awoodda guddida mihnadlayaasha caafimaadka ee hubinta tayada dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka.
- Waxa uu xoojin doonaa adeegsiga tiknoolajiyada casriga ah ee maamulka caafimaadka iyo kaydinta xogta ee wasaaradda horumarinta caafimaadka.

### Nidaaminta Adeeg bixinta Caafimaadka Maanka (dhimirka)

- Waxa uu xoojin doonaa dhaqan-gelinta siyaasadda daryeelka iyo adeeg-bixinta caafimaadka maanka (dhimirka) si ay u helaan adeeg daryeel iyo mid daawayneed oo duruuftooda ku haboon oo lacag la'aan ah.
- Waxa uu dejin doonaa barnaamijyo lagu daryeelayo bukaanka ka ladnaaday xanuunka dhimirka iyo dadka ka cabanaya cadaadis maskaxeed iyada oo loo samaynayo xarumo daryeelka maanka ah ee bulshada (Community phsychosocial centers).
- Waxa uu dejin doonaa habraacyo iyo nidaamka isu-gudbinta bukaanka (Referral mechanism) si loo fududeeyo wada-shaqaynta cusbitaalada, xarumaha daryeelka maanka, cilaajyada iyo xarumaha daawo-dhaqameedka.
- Waxa uu dejin doonaa qorshe lagu xakamaynayo noocyada maandooriyeyaasha iyo saamaynta ka dhalan karta adeegsiga maandooriyaha ee maskaxda iyo maanka qofka.

## Horumarinta Khayraadka Biyaha iyo Fayodhawrka

Helitaanka biyo ku filan oo dabooli kara baahiyaha kala duwan ee nolosha dadka, daaqa, xoolaha nool, duurjoogta iyo fayo-dhowrkoodu, waxay ahmiyad wayn u leedahay caafimaadka iyo guud ahaan jiritaanka nololeed ee bulsho. Sababtaas awgeed, ayuu xisbiga kulmiye dhaqaale, farsamo iyo dedaal dheeraad ah u geliyay muddo xileedkiisa labaad in dalka badankiisa kor loo qaado awoodda soo saarista biyaha hoose iyo qabashada biyaha roobka.



***Muddo Xileedkiisa labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Waxa uu **45%** kor u qaaday helitaanka biyaha ee bulshada ku nool miyi/magaalo.*
- *Waxa la qoday **184** ceel biyood oo dhaadheer.*
- *Waxa la sameeyay **100** dhaam-biyood, iyo **22 doox-xidh** (sand/sub-surface dam)*
- *Waxa cillad saar iyo dayactir joogto ah lagu sameeyey **322** ceelashii hore u jiray ah.*
- *Waxa la dhisay berkadaha kaydka biyaha oo dhan **225**, halkay markii hore ka ahaayeen **85** berkadood.*
- *Waxa la hirgeliyay barnaamijyo lagu qabanayo qulqulka biyaha roobka ee goobo badan oo dalka ah.*
- *Waxa la kordhiyay biyaha magaalooyinka waawayn iyo kuwa yaryarba in ka badan **30%.***
- *Waxa la hirgeliyay xarumaha shaybaadhka hubinta tayada biyaha ee Wasaaradda Horumarinta Khayraadka Biyaha iyo Wakaaladda Biyaha Hargeysa.*
- *Waxa in ka badan **400** goobood lagu sameeyay daraasaado lagu sahaminayo biyaha dhulka hoostiisa ku jira, diraasadahani waxa ay suurto galiyeen in lagu guulaystay in laga helo biyo goobo ka mid ah deegaanada hawdka laga bilaabo deegaanka Tog-Wajaale ilaa deegaanka Qoriley ee gobolka Sool oo aan hore biyo loogu ogayn.*
- *In ka badan **30,000** oo guri oo ku yaalala caasimadda Hargeysa ayaa biyo hela ka dib dibu-habayn, casriyayn iyo balaadhin lagu sameeyay nidaamka kaydka iyo qaybinta biyaha ee caasimadda.*
- *Waxa la kordhiyay in ka badan **350%** awoodda biyo soosaar ee ceelasha Geedeeble ee waraabiya caasimadda Hargeysa, iyada oo la gaadhsiiyay **22,000**$M^3$ oo u dhiganta **18** million oo liter/maalintii, halka ay markii hore biyo soosaarku ka ahaa **6,500**$M^3$ oo u dhiganta **6.5** million liter/maalintii.*

- *Waxa la kordhiyay qaababka farsamo ee biyaha lagu gaadhsiiyo bulshada ku nool caasimadda .*
- *Waxa la qalabeeyey xarunta cusub ee biyo-soo-saarka Hargeysa, iyada oo lagu rakibay afar mishiin laydh oo waaweyn iyo seddex bam oo midkiiba ka awood badan yahay lixdii bam ee hore ee Geed Deeble biyaha ka soo tuuri jiray.*
- *Waxa lagu kordhiyaya Sagaal Ceel oo cusub iyo dhaamka wayn ee Kalqorey oo lagu xoojinayo biyo soo saarka caasimadda Hargeysa.*
- *Waxa qalabka macaanaynta biyaha lagu rakibay ceelasha dadwaynuhu ka cabaan ee gobolada Sool iyo Sanaag.*



**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad ee 2024-2029,** waxa u qorshaysan:

- Waxa uu dejin doonaa qorshe ay Wasaaradda Horumarinta Khayraadka Biyahu ku yeelanayso awoodda iyo qalabka lagama maarmaanka u ah soo saarista iyo qabashada biyaha.
- Waxa uu xoojin doonaa samaynta daraasado iyo sahamin lagu sameeyo qulqulka biyaha dooxooyinka si ay u fududaato samaynta dhaamam waawayn oo lagu joojiyo biyaha roobabka ee qulqula si wax looga qabto baahida biyo yaraanta ee dalka ka jirta.
- Waxa uu qodi doonaa 250 ceelasha dhaadheer ah, 100 ceelasha gaagaaban ah, 300 dhaam biyood (haffir dam) iyo 10 dhaam biyood waawayn oo la xidhayo togag.
- Waxa uu xoojin doonaa dhaqan-gelinta shuruucda iyo siyaasadaha maamulka iyo maaraynta sahaminta, soo saarista, kaydinta iyo ka faa'iidaysiga khayraadka biyaha roobka iyo kuwa dhulka hoostiisa ku jira.

- Waxa uu xoojin doonaa samaynta daraasado iyo sahamin dhamaystiran oo la xidhiidha biyaha dhulka hoostiisa ku jira (Hydro-geological studies and mapping).
- Waxa uu dejin doonaa qorshayaasha maamulka iyo maaraynta biyaha (Water management master plans) ee magaalooyinka.
- Waxa uu xoojin doonaa awoodda wasaaradda iyo wakaaladaha biyaha si loo hubiyo in soo saarista, habka qaybinta iyo maaraynta biyuhu la jaanqaadayaan korodhka baahida biyaha ee gobollada iyo degmooyinka.
- Waxa uu xoojin doonaa dayactir joogto ahna lagu sameynayaa ilo-biyoodyada iyo kaydadka biyaha iyada oo la gaadhsiinayo heer gobol.
- Waxa uu xoojin doonaa casriyaynta nidaamka dacaytirka ilo-biyoodyada iyo kaydadka iyada oo lagu qalabayn doono dhammaan agabka lagama maarmaamka u ah sida tamarta la cusboonaysiiyo (renewable energy) gaar ahaan tamarta cadceedda (solar system).




- Waxa uu hagayaal iyo halbeegyo u samayn doonaa nidaamka fayo-dhawrka iyo nadaafada biyaha ee goobaha biyo soosaarka.
- Waxa uu dejin doonaa barnaamijyo lagu gaadhsiinayo qalabka biyaha nadiifiya deegaamada leh biyaha qadhaadh si bulshadu u hesho biyo macaan oo nadiif ah, cabitaankana ku haboon.
- Waxa uu xoojin doonaa adeegsiga tiknoolajiyadda casriga ah ee la xidhiidha maaraynta iyo kaydinta xogta biyaha.
- Waxa uu dejin doonaa nidaam lagu xoojinayo maamulka ilo-biyoodyada iyo kaydadka biyaha.
- Waxa uu xoojin doonaa Machadka Tababarka Culuumta Biyaha ee Wasaaradda Horumarinta Khayraadka Biyaha.

## Daryeelka Bulshada

Xisbiga Kulmiye waxa uu dadaal ugu jiraa yarraynta saboolnimada, daryeelka dadka duruufaha gaarka ahi haystaan, dadka gobowgu haleelay iyo kuwa u nugul duruufaha nolosha iyo sidii loo xoojin lahaa guud ahaan nidaamka daryeelka qaybaha bulshada.




***Xisbiga Kulmiye muddo xilleedkiisii labaad waxa u hirgaley:***

- *Dadaal laga sameeyay sidii haweenku qoondo u gaar ah uga heli lahaayeen kuraasta golayaasha xeer dejinta.*
- *Waxa la diyaariyay **89** dufcadood oo kor loogu qaaday horumarinta xirfadaha hoggaaminta ee haweenka, iyadoo ujeedadu ahayd in ay haweenku hantaan xilalka sarsare ee dalka.*
- *Waxa la hirgeliyay barnaamijka maalgelinta haweenka aan waxbarashada tooska ah helin kaas oo fursad waxbarasho siiyay **30,902** oo haween ah iyada oo fursado shaqo iyo maalgalinba ay ka heleen **14, 245** haween ah.*
- *Waxa la hirgeliyey nidaamka ka jawaabida tacadiyadu ku dhaca haweenka sida kufsiga iyo mushkiladaha qoysaska si loogu fududeeyo inay helaan baadhitaan caafimaad oo degdeg ah, adeeg sharci oo lacag la'aan ah iyo la talin shaqsi ah.*
- *Waxa qoondo kab miisaaniyadeed oo dhan **40,810,000,000SLSH** u gaar ah la siiyay ururrada bulshada sida; beelaha laga tirada badan yahay, ururrada naafada ah, ururka haweenka qaranka iyo dalladda guud ee shaqaalaha rayidka ah.*
- *Waxa la sameeyay nidaamka xallinta khilaafaadka shaqada kaas oo in ka badan **7,500** kiis lagu xaliyey, laguna sugay xaquuqda shaqaallaha iyo loo shaqeeyaha dhexdooda.*

- *Waxa la abaabulay, lana habeeyay ururrada shaqaalaha dalka iyada oo la diwaangeliyay in ka badan **14** urur oo shaqaale oo ku midoobay xirfadaha kala duwan ee ay ku shaqeeyaan.*
- *Waxa taageero raashin la siiyay tiro dhan **701,916** qoys oo qaybaha bulshada ee nugul ah. Sidoo kale, waxa ka faa'idaystay barnaamijyada lacagaha taakulada daryeelka bulshada iyo hooyada iyo dhalaanka **35,109** caruur ah iyo **41,667** qoys.*
- *Waxa la sameeyay barnaamij lagu taageerayo dadka naafada ah iyadoo isugayn waxbarasho lacag la'aan ah la siiyay **554** naafo ah.*
- *Waxa la qaybiyay **6,471** baaskiiladaha socodka, **1,007** usha cad ee caawisa dadka aragga naafada ka ah iyo **4,003** kabaha dheellitirka socodka ee dadka naafada ah.*
- *Waxa la fududeeyay qalliinada fudud ee dadka naafada ah oo ay ka faa'idaysteen dad tiradoodu dhan tahay **3, 254**.*
- *Waxa la xoojiyay, lana taageerey goobaha wax lagu baro dadka naafada ah kuwaas oo si lacag la'aan ah ku gaadhsiiya noocyada kala duwan ee qalabka naafada.*
- *Waxa taageero dhaqaale iyo mid farsamo la siiyay xarumaha lagu tababaro dadka maqalka naafada ka ah oo la barey luuqadda suuldhabaalaha taas oo xoojisey iskuxidhka bulshada iyo dadka maqalka naafada ka ah.*



**Xisbiga kulmiye muddo xileedka saddexaad 2024-2029,** waxa uu sii xoojinayaa nidaamka daryeelka bulshada, iyadoo la hirgelin doono qorshayaashan:

- Waxa uu hirgelin doonaa barnaamijka daryeelka carruurta naafada ah iyo carruurta aan daryeel waalid helin ee da'doodu u dhaxayso gu' jir ilaa 15 jir. Barnaamijkani waxa uu koobsanayaa bixinta waxbarasho iyo xannaano u gaar ah, gaadiidkooda, daryeelkooda caafimaad iyo jidh-dhiskooda.
- Waxa uu dhamaystirayaa xeerka kufsiga si loo xoojiyo ilaalinta xaquuqda carruurta iyo haweenka.



- Waxa awood sharci oo dheeraad ah la siin doonaa hay'adaha dawladda ee ku shaqada leh la dagaalanka maandooriyaha, balwadaha iyo dhaqan-xumada.
- Waxa uu samayn doonaa nidaam daryeel bulsho oo kor u qaadaya tayada nololeed ee bulshadda, isla markaana hoos u dhigaya heerka saboolnimada sida taageeridda bulshada nugul.
- Waxa uu sii joogtayn doonaa kabka miisaaniyadeed iyo qoondada dhaqaale ee la siiyo ururrada dadka naafada ah.
- Waxa uu xoojin doonaa wadashaqaynta iyo isku-xidhnaanta daneeyayaasha kaalmada dadka naafada ah, daryeelka caruurta iyo ilaalinta xaquuqda haweenka.

- Waxa uu daraasad ku samayn doonaa si loo siiyo daryeelka iyo taageero dadka gabowgu haleelay ee goblanka ah, ee aan lahayn cid noloshooda kafaala qaadda.
- Waxa uu kor u qaadi doonaa tirada iyo xirfadda aqooneed ee hawl-wadeenada ka shaqeeya arrimaha daryeelka caruurta iyo ilaalinta xaquuqda haweenka.
- Waxa uu samayn doonaa nidaam lagu diiwaan galiyo dadka baahan si loo helo xog dhamaystiran oo la xidhiidha baahida iyo daryeelka bulshada.
- Waxa uu hirgelin doonaa siyaasadda guud ee dadka naafada ah, taas oo sugaysa xuquuqdooda asaasiga ah.




- Waxa uu hirgelin doonaa xarun qaran oo laga helo xogta tacadiyada ka dhanka ah haweenka taas oo ujeedadeedu tahay in la isku-dubarido xogaha tacadiyada ee ka kala yimaada xarumaha dawliga ah & kuwa gaarka loo-leeyahay, laguna bixiyo adeegyada ay u baahan yihiin dhibanayaashu.
- Waxa uu hirgelin doonaa nidaam fududeeya helista xogta fursadaha shaqo ee ka banaan dalka iyada oo ay hormuud ka yihiin xafiiska shaqada ee wasaarada shaqo-gelinta iyo hay'adda shaqaalaha dawladda.
- Waxa uu samayn doonaa cilmibaadhis iyo daarasad la xidhiidha ururinta xogta arrimaha shaqada iyo shaqo la'aanta ee dalka.
- Waxa uu samayn doonaa nidaam lagu diiwaan galiyo xogta shaqaalaha rayidka Somaliland u dhashay si loo dardargaliyo habka dib u habaynta shaqaalaha rayidka ah.

## Haweenka

- Waxa uu xoojin doonaa barnaamijyada dhiirigalinaya in ay haweenku kaalin mug leh ka qaataan siyaasadda, iyada oo la xoojinayo ololayaasha wacyigalineed ee la xidhiidha ka qaybgalka siyaasadeed ee haweenka.
- Waxa uu sii wadi doonaa dedaalka in golayaasha sharcidajinta Somaliland ansixiyaan kootada haweenka ee hortaalla.



- Waxa uu dhiiri galin doonaa doodaha iyo wadahadalka bulshada ee la xidhiidha ka qaayb qaadashada haweenka ee arrimaha horumarinta bulshada, siyaasadda iyo kor u qaadista xuquuqda haweenka.
- Waxa uu xoojin doonaa dhaqan gelinta sharciyada iyo xeerarka loogu talo galay ka hortagga takoorka siyaasadeed ee haweenka iyo beelaha laga tiro badan yahay.
- Waxa la curin doonaa, lana dhaqan gelin doonaa siyaasadda gudniinka hablaha si loo suuliyo caadooyinka dhaqan ee gudniinka hablaha.
- Waxa uu samayn doonaa barnaamijyo tababar hoggaamineed lagu siinayo haweenka ku jira siyaasadda si ay uga gudbaan caqabadaha hoggaaminta siyaasadda.
- Waxa uu sii wadi doonaa taageerada la siiyo ururrada haweenka ee jira.

## Dhalinyarada iyo Ciyaaraha

Xisbiga kulmiye, waxa uu aaminsan yahay in dadaal kasta, taageero kasta iyo tamar kasta oo lagu bixiyo dhallinyarada iyo ciyaaraha ay wax wayn ka tarayso horumarka bulshada, yaraynta dhaqan-xumada, kobcinta garaadka iyo caafimaadka jidheed ee dhalinyarada oo ah dhaxlayaasha iyo hoggaamiyayaasha berri.

***Muddo Xileedkiisa labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Waxa la dhisay xarumaha horumarinta dhalinyarada oo casri ah, lagana hirgeliyay gobollada Maroodi-jeex,Saaxil, iyo Gebilay.*
- *Waxa la tababaray,laguna taageeray dhaqaale dhalinyaro ka badan* ***7,000*** *oo qof.*
- *Waxa dhisme cusub, dibu-habayn iyo casriyayn lagu sameeyay in ka badan* ***10*** *garoomada ciyaaraha ah.*
- *Waxa la qabtay oo si guul ah ku dhamaaday tartamada ciyaaraha ee kala duwan oo tiradoodu dhan tahay* ***95*** *tartan-ciyaareed.*
- *Waxa la xoojiyey, lagana shaqaysiiyay sanduuqa horumarinta dhallinyarada oo lagu shubay qoondo maaliyadeed oo loogu talogalay horumarinta dhallinyarada.*
- *Waxa si wayn kor loogu qaaday in dhallinyarada aqoonyahanka ahi kaalin mugleh ka qaataan hawlaha siyaasadeed kana mid noqdaan golayaasha qaranka.*



**Xisbiga Kulmiye muddo xilleedka saddexaad 2024-2029,** waxa uu sii xoojinayaa barnaamijyada lagu horumarinayo dhallinyarada iyo ciyaaraha, iyadoo la hirgelin doono qorshayaashan:

## Dhallinyarada

- Waxa uu diyaarin doonaa barnaamij shaqo abuur loogu samayn doono tiro dhan 20,000 oo dhallinyaro ah ee dhammaan gobollada dalka.
- Waxa uu samayn doonaa barnaamijyo ganacsi yaryar loogu samaynayo dhalinyaro tiradoodu gaadhayso 5,000 oo qof.
- Waxa uu aasaasi doonaa xarumo lagu tabobaro dhallinyarada shaqo-doonka ah.
- Waxa uu sii wadi doonaa barnaamijka Shaqo Qaran oo fursado isku mid ah u abuuray dhallinyarada ku sugan gobollada dalka.
- Waxa uu sii wadi doonaa dhiirrigelinta in dhallinyartu ka qayb-qaataan xukunka dawladnimo ee dalka, waxanu Xisbiga Kulmiye dhallinyarada xukunka ka siin doonaa saami ka badan intii hore.
- Waxa uu aasaasi doonaa lix maktabadaha wax akhriska ah iyadoo kuwii hore u jirayna awooddooda adeeg-bixineed kor loo qaadayo.
- Waxa uu hirgelin doonaa afar xarumo dhallinyaro oo laga dhisi doono Awdal, Togdheer, Sool iyo Sanaag.



## Ciyaaraha

- Waxa uu xoogga saari doonaa sidii xulalka qaranka ee ciyaaraha kala duwan ee Jamhuuriyadda Somaliland ay u heli lahayeen fursad ay kaga qayb galaan tartamada caalamiga ah.
- Waxa uu dhisi doonaa shan garoomada ciyaaraha kala duwan ah, kuwaas oo si casri ah loo dhisayo loona qalabaynayo, iyada oo kuwii hore u jirayna dayactir iyo casriyayn lagu samayn doono.
- Waxa uu mudnaan gaar ah siin doonaa ciyaaraha fudud gaar ahaan orodadda, dabaasha, bootinta iyo noocyada kale ee ciyaaraha fudud.
- Waxa uu hirgelin doonaa dhismaha akaadamiyada tababarka ciyaartoyga heerarka kala duwan, si loo soo saaro dhallinyaro leh xirfad ciyaareed oo heer caalami ah.



- Waxa uu dhiirrigelin doonaa curinta iyo hal-abuurka kala duwan ee dhallinyarada kuwaas oo sannad kasta abaalmarin lagu bixin doono.
- Waxa uu joogtayn doonaa, ahmiyad gaar ahna siin doonaa qabashada tartamada ciyaaraha horyaalada kala duwan ee heer qaran, heer gobol iyo heer degmo.

## Hirgelinta Nidaamka Caymiska Qaranka

- Waxa uu hirgelin doonaa caymiska caafimaadka shaqaalaha dawladda si looga yareeyo culayska shaqaalaha ka haysta kharashka daawaynta iyo daryeelka caafimaadka iyada oo shaqaalaha dawladdu ay bixin doonaan qayb kooban oo ka mid ah kharashka caymiska iyada oo loo eegi doono mushaharka ay qaataan.
- Waxa uu hirgelin doonaa nidaam suurto galiya in caymis la galiyo bixinta magta ka dhalata shilalka gaadiidka, si culayska looga qaado ardaayada, odayaasha dhaqanka iyo guud ahaan bulshada qaybaheeda kala duwan.
- Waxa uu samayn doonaa cilmibaadhis iyo daarasado la xidhiidha hirgelinta hababka caymiska casriga ah ee aduunka.



## Cududda Shaqaalaha Dawladda

Cududda Shaqaalaha dawladdu waa halbawlaha ugu muhiimsan ee socodsiiya adeegyada wasaaradaha iyo hay'adaha dawladdu u qabtaan bulshada. Hadaba, si loo dardargaliyo adeeg bixinta bulshada waxa lagama maarmaan loo arkay in la horumariyo daryeelka, aqoonta iyo xirfadda shaqaalaha dawladda.

### *Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisii labaad waxa u hirgalay:*

- *Curinta iyo dhaqan gelinta Xeerka Shaqaalaha Dawladda.*
- *Samayanta nidaamka iswada ee dalacsiinta iyo darajo bixinta shaqaalaha, nidaamka maamulka shaqaalaha dawladda ee **HRMIS** iyo nidaamka hawlgabka shaqaalaha dawladda.*
- *Hirgelinta in shaqaalaha dawladdu mushaharka ku qaataan nidaamka fudud ee lacagta telefoonka loogu diro (**e-Shiling**).*
- *Dalacsiinta tiro shaqaale ah oo gaadhaysa **3,500** oo shaqaale dawladeed ah.*
- *Kor u qaadista xirfadda shaqo iyo tayada aqooneed ee shaqaalaha dawladda iyaga oo tiro dhan **8,381** shaqaale dawladeed la siiyay waxbarasho ku siman diblooma ilaa heer darajada labaad ee jaamacadda.*
- *Dhisidda machadka tababarka shaqaalaha dawladda ee gobollada bari kaas oo laga hirgeliyay magaalada Burco.*



**Xisbiga Kulmiye muddo xileedka saddexaad 2024-2029,** waxa uu sii xoojinayaa nidaamka kobcinta tayada shaqaalaha iyo daryeelkooda, iyadoo la hirgelin doono qorshayaashan:

- Waxa uu casriyayn doonaa nidaamka shaqaalaysiinta, la socodka shaqada iyo habka adeeg bixinta.
- Waxa uu hirgelin doonaa nidaamka iyo siyaasadda qaabeynta mushaharka iyo darajooyinka shaqaalaha dawladda.
- Waxaa uu sii wadi doonaa tayeynta iyo tobobarka shaqaalaha dawladda iyada oo kor loo qaadayo aqoontooda iyo xirfaddooda.
- Waxa xoojin doonaa awoodda hawl qabad ee Machadka Tababarka Shaqaalaha Dawladda iyada oo la kordhinayo noocyada aqoonta ee uu siinayo shaqaalaha dawladda, laguna jaangoynayo baahida shaqada dawladda.
- Waxa uu aasaasi doonaa hay'adda xaqsiinta iyo hawlgabka qaranka oo ku aasaasan xeer baarlamaan.
- Waxa uu dejin doonaa qorshaha hawlgabka qaranka si loo dhaqan galiyo xeerka hawlgabka iyo xaq-siinta shaqaalaha dawladda, si shaqaalaha dawladdu u helaan xaq iyo daryeel.
- Waxa nidaamka hawlgabka la gelin doonaa xubnaha shaqaalaha dawladda ee gaadhay da'da hawlgabka.
- Waxa la hirgelin doonaa barnaamijyo maalgelineed oo ay samaynayso hay'adda xaqsiinta iyo hawlgabka qaranka oo wax weyn ka tari doona kor u qaadista shaqo abuurka iyo koboca dhaqaalaha dalka.

## Kaydka Raashinka iyo Maaraynta Masiibooyinka:

Xisbiga Kulmiye isaga oo ogsoon in ay lagama maarmaan tahay isku-dubbaridka hawlaha la xidhiidha la socodka, u diyaar-garowga, ka-hortagga iyo yaraynta saamaynta xaaladaha degdegga ah ee Somaliland waxa uu sameeyay Hay'adda Kaydka Raashinka iyo Maaraynta Masiibooyinka si la isugu duba rido loona mideeyo maaraynta masoobooyinka gargaar degdeg ahna loo gaadhsiinayo bulshooyinka uu dhibku gaadhay.

***Xisbiga Kulmiye muddo-xilleedkiisii labaad waxa uu:***

- ***1,406,526** qof oo ka mid ah dadkii ay saameeyeen abaaraha iyo duufaanadii ka dhashey isbedalka cimilada oo ku kala sugan gobollada dalka ayaa la gaadhsiiyay taageero iyo raashin caawimo ah.*
- *Waxa la hirgeliyay xarumaha Hay'adda Kaydka Raashinka iyo Maaraynta Masiibooyinka iyo xarumaha kaydka raashinka ee gobollada.*
- *Waxa la aasaasay xarunta diginin bixinta Aaafooyinka dabiiciga ah (Natural Disaster).*



**Xisbiga Kulmiye muddo xilleedka saddexaad 2024-2029,** waxa uu sii xoojinayaa nidaamka kaydka raashinka iyo maaraynta masiibooyinka, iyadoo la hirgelin doono qorshayaashan:

- Waxa uu xooji doonaa awoodda hawl qabad ee Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Kaydka Raashinka Qaranka si ay awood ugu yeelato u diyaargarowga iyo ka jawaabista masiibooyinka dabiiciga ah.
- Waxa uu ballaadhin iyo tayeyn ku samayn doonaa xarunta digniin bixinta (early warning center) si loogu diyaar garoobo saamaynta masiibooyinka degdegga ah.
- Waxa uu kor u qaadayaa awoodda hawlqabad ee ciidamada dabdemiska qaranka si loo xakameeyo, loona yareeyo saamaynta dabka iyo masiiboyiinka kale.
- Waxa uu samayn doonaa barnaamijyo lagu wacyi galinayo bulshada oo la xidhiidha u diyaar garowga iyo ka hortagga masiibooyinka dabiiciga ah.
- Waxa uu ballaadhin iyo xoojin ku samayn doonaa xarumaha kaydka raashinka qaranka, kuwo cusubna wuu dhisi doona.

## Horumarinta Dhawrista Tayada

Caafimaadka iyo fayo-qabka muwaadiniintu waa u lafdhabar horumarka dalka iyo dawladnimada. Sidaa darteed, Xisbiga Kulmiye waxa uu ahmiyad gaar ah siinayaa dhawrista tayada dawada, cuntada, qalabka iyo agabka la soo dejiyo.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Dhismaha iyo qalabaynta shaybaadhka baadhista tayada.*
- *Hirgelinta shaybaadhka hubinta calafka iyo dalagga beeraha.*
- *Samaynta heertayeedada qaranka oo tiradoodu gaadhayso **97** heertayeed.*
- *Waxa kor loo qaaday la dagaalanka badeecadaha tayadoodu hoosayso ama la been abuuro.*
- *Waxa la bilaabay bixinta sumadda tayada si loo siiyo warshadaha iyo shirkadaha wax-soosaarka dalka.*



## Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029:

- Waxa uu xoojin doonaa awoodda hawl qabad ee Hay'adda Dhawrista Tayada.
- Waxa uu samayn doonaa siyaasadda bedqabka cuntada (national quality food policy).
- Waxa uu samayn doonaa siyaasadda tayada qaranka (national quality policy)
- Waxa uu hirgelin doonaa shaybaadhka cabiraadaha ee hubinta iyo la socodka heerka Tayada.
- Waxa uu hirgelin doonaa shaybaadhka qalabka korontada iyo elektaroonikada.
- Waxa uu dardar galin doona helista shahaadada guud ee aqoonsiga caalamiga ah ee shaybaadhada (ISO).
- Waxa uu xoojin doonaa bixinta sumadda/calaamadda tayada (quality mark).



## Warbaahinta

Xisbiga KULMIYE wuxu aamminsan yahay in warbaahintu tahay tiirka afraad ee qarannimada. Warbaahin madaxbannaan oo firfircooni waxay muhiim u tahay tisqaadka xoriyadda hadalka iyo maamul wanaagga. Balse, kaalintaa muhiimka ah waxa qaadan kara warbaahin leh mihnad saxaafadeed oo sarraysa, akhlaaqiyaad suubban iyo dheelitirka xogaha iyo wararka.

### *Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:*

- *Waxa la aasaasay machadka tababarka warbaahinta iyo xarunta wada-xidhiidhka dawladda (Somaliland Communication Center.*
- *Waxa la hirgeliyay **13 FM** oo awoodoodu u dhexayso **1,000 kw** ilaa **2,000 kw**.*
- *Waxa taageero dhaqaale iyo mid farsamo oo joogto ah la siiyaa ururada saxaafadda iyo fanaaniinta qaranka.*
- *Waxa dib-u-dhis iyo qalabayn casri ah lagu sameeyey **saddexda** istuudyo ee Raadhiyow Hargaysa iyo istuudyaha wakaalada wararka Solna.*
- *Waxa dib u habayn, qalabayn lagu sameeyey istuudyaasha warqabadka iyo diyaarinta barnaamijyada telefishanka qaranka, sidoo kalena teleshika lagu qalabeeyey kamaradaha casriga ah ee wax lagu duubo.*



**Xisbiga Kulmiye muddo-xilleedkiisa saddexaad 2024-2029,** waxa uu sii xoojinayaa madaxbanaanida saxaafadda Somaliland si waafaqsan dastuurka iyo xeerarka saxaafadda dalka:

- Waxa uu xoojin doonaa awoodda wasaaradda warfaafinta ee la dagaalanka dacaayadaha liddiga ku ah qarannimada iyo jiritaanka Somaliland.
- Waxa uu gaadhsiin doonaa idaacadda reedhyow Hargeysa iyo FM-yada dhammaan gobollada iyo degmooyinka dalka.
- Waxa la samayn doonaa xarumo wartabineed iyo istuudyayaal uu telefishanka qaranku ku yeesho gobolada.



- Waxa uu horumarin iyo casriyayn ku samayn doonaa siyaasadaha, habraacyada iyo hagayaasha maamula warbaahinta iyada oo lala jaanqaadayo isbedelka ku yimid warbaahinta gaar ahaan baraha bulshada.
- Waxa uu kor u qaadi doonaa awoodda hawlqabad ee machadka tababarrada saxafiyiinta ee xarunta wasaaradda warfafaafinta laguna tababaro dhammaan saxafiyiinta dawlada iyo kuwa madaxabanaan.
- Waxa uu samayn doonaa barnaamijyo loogu talo galay horumarinta hiddaha iyo dhaqanka wanaagsan ee bulshada sida qabanqaabinta carwooyin lagu dhiirigalinyo dhaqanka iyo hiddaha soo jireenka ah ee ummadda Jamhuuridda Somaliland.
- Waxa uu xoojin doonaa damaanad qaadka xorriyadda saxaafadda iyada oo la dhawrayo xeerarka iyo shuruucda dalka, laguna hagayo mabaa'diida Islaamka, qiyamka suuban iyo hiddaha soo jireenka ah ee ummaddeenna.
- Waxa uu xoojin doonaa barnaamijyada kor loogu qaadayo tayada iyo horumarinta warbaahinta dawladda iyo ta gaarka loo leeyahay.
- Waxa uu sii wadi doona kaalmada dhaqaale iyo xoojinta awoodda ururrada saxaafadda ee dalka.

## Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guryaynta

Habaynta, maamulka iyo qorshaynta dhulka magaalooyinku waxay ahmiyad wayn u leedahay in la helo magaalooyin nidaamsan oo u diyaarsan nolol, lehna qorshe u jaan go'an baahida loo qabo in la helo dhul laga hirgeliyo adeegyada bulshada iyo kaabayaasha dhaqaalaha sida waddooyinka, cusbitaalada, dugsiyada waxbarashada, goobaha ciyaaraha iyo meelo dadku ku nastaan. Sidoo kale, in la helo dhismaha guryaha shaqaalaha, ciidamada iyo danyarta waxa sabab u ah helista dhul ku haboon degsiimo lana gaadhsiin karo adeegyada guud sida laydhka, biyaha iyo nidaamka fayodhawrka iyo nadaafada.



### *Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:*

- *Waxa la diiwaan galiya hantida maguurtada ah ee dawladda dhexe.*
- *Waxa loo sameeyay lana hirgeliyay naqshadayn dhamaystiran (Master Plan) magaalooyinka: Borama, Ceerigaabo, Lascaanood, Gabiley, Baligubadle, Salaxlay, Oodwayne, Sheekh, Wajaale, Xariirad, Alleybadey, Inaguuxaa, Agabar, Warcimraan, Lawyacado, Geedbalaadh, Balicabane, Dacar budhuq, bulaxaar iyo Laasciidle.*
- *Waxa la curiyey, lana dhaqangaliyay siyaasadda dhulka, siyaasada diiwaagalinta hanti-guurtada iyo maguurtada, siyaasadda keydinta xogta wasaaradda iyo siyaasadda magaalaynta (urbanization policy).*
- *Waxa la sameeyay habraaca qorshaynta magaalooyinka, habraaca ilaalinta tayada dhismayaasha, habraaca diiwaangalinta shirkadaha iyo farsamo yaqaanada iyo habraaca bedqabka shaqaalaha dhismayaasha.*

**Xisbiga Kulmiye muddo xilleedkiisa saddexaad 2024-2029,** waxa uu sii wadi doonaa xoojinta maaraynta iyo maamulka hawlaha guud, dhulka iyo guryaynta:

- Waxa uu curin doona Xeerka Guud ee Dhulka (Land Comprehensive Act) iyo habraacyada sharci ee ka farcamaya.
- Waxa uu curin doonaa Xeerka Dhismaha (Building Code) si loola socdo noocyada iyo tayada dhismayaasha laga hirgelinayo dalka.
- Wax uu kaabis iyo wax ka bedel ku samayn doonaa Xeerka Maamulka MagaalooyinkaXeer.17/2008.
- Waxa uu xoojin doonaa curinta iyo dhaqan galinta xeerarka iyo siyaasadaha adeegsiga dhulka si siman looga faa'iidaysto.
- Waxa uu dib u habayn iyo xoojin ku samayn doonaa nidaamka lahaanshaha dhulka iyo xuquuqda lahaanshaha dhulka.
- Waxa uu kor u qaadi doonaa barnaamijyada ilaalinaya deegaanka korna u qaadaya dhismayaasha cagaaran, iftiiminta magaalooyinka iyo adeegsiga tamarta dib loo cusboonaysiiyo.
- Waxa uu si joogto ah hubin iyo dabagal ugu samayn doonaa qorshayashii loo sameeyey magaalooyinka waaweyn ee dalka iyo ilaalinta dhulka danta guud ee la diiwaan galiyey.
- Waxa uu dhamaystiri doonaa naqshadaynta guud ee magaalooyinka (masterplan) ee Hargeysa, Berbera iyo Burco, si loo helo qorshe dhamaystiran oo kala xadaynaya goobaha adeegyada bulshada, dalxiiska, madadaalada, aagagga warshadaha iyo degsiimooyinka .



## Barakacayaasha iyo Qaxootiga

Xisbiga Kulmiye waxa uu aaminsan yahay in ilaalinta xuquuqda qaxootiga magangalyo-doonka, iyo barakacayaashu uu yahay waajib bani'aadamnimo sidoo kalena ay waajib tahay hirgelinta sharciga caalamiga ah gaar ahaan Heshiiska Qaxootiga ee Qaramada midoobay 1951 iyo Borotokoolkiisa 1967, iyo heshiis goboleedyada oo dalalka madaxabanaan ku waajibinaya in ay ilaaliyaan xuquuqaha bani'aadamnimada, sharafta iyo karaamada dadka ka soo cararaya dulmi, dagaal, ama khataro kale oo halis ku ah noloshooda iyo xorriyaddooda .

Waxa kale oo uu aaminsan yahay in dawladdu siiso taageero bani'aadamnimo muwaadiniinta ku barakacay dalka gudihiisa sababo la xidhiidha masiibooyiin dabiici ah ama mid bani'aadamku sameeyay.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Adeegyada barakacayaasha loo qabtay:*
  - ***177,431** qoys ayaa loo qaybiyay raashin*
  - ***65,370** qoys ayaa la siiyay alaabada aan cuntada ahayn.*
  - ***58,156** qoys ayaa la gaadhsiiya kaalmo lacageed oo toos ah.*
  - ***17,056** qoys ayaa dhul la siiyay, guryo loo sameeyay, musqulo loo sameeyay laguna caawiyey iftiinka guryaha (solar system).*
  - ***1,810** qoys ayaa loo sameeyay maalgalin ganacsi.*
  - ***2,437** qoys ayaa loo sameeyay beero iyo taangiyo biyood.*
- *Adeegyada qaxootiga loo qabtay:*
  - ***8,775** qoys ayaa la gaadhsiiyay taakulo lacageed iyo raashin.*
  - ***28,794** qoys ayaa loo fidiyay adeeg caafimaad iyo waxbarasho.*
  - ***8,952** qoys ayaa adeeg sharci loo fidiyay*
- *Waxa la fududeeyay soo celinta **5,893** qof oo muwaadiniin ah oo dalka dibadiisa laga keenay.*
- *Waxa la dejiyay lana dhaqan galiyay Xeerka Qaxootiga iyo Magan-gelyo doonka XEER Lr. **103/2023**.*

**Xisbiga Kulmiye muddo-xilleedkiisa saddexaad 2024-2029,** waxa uu sii wadi doonaa xoojinta adeeg bixinta qaxootiga, magangalyo-doonka iyo barakacayaasha:

- Waxa uu kordhin doonaa awoodda hawl-qabad ee Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka.
- Waxa uu kordhin doonaa barnaamijyada lagu xoojinayo isla markaana lagu tayaynayo adeegyada ay helaan qaxootiga, magangelyo-doonka iyo barakacayaashu si kor loo qaado duruufahooda nololeed.
- Waxana uu xoojin doona xidhiidhka iyo wadashaqaynta laamaha dawladda iyo hay'adaha aan dawliga ahayn, si loo mideeyo deeqaha iyo kaalmada la siinayo qaxootiga, magangelyo-doonka iyo barakacayaasha.

- Waxa uu xoojin doonaa talo bixinta iyo adeeg-siinta caafimaadka maanka (pshycosocial support) si loo yareeyo cadaadis maskaxeedka ka dhasha duruufaha barakaca iyo qaxootinimada.
- Waxa uu kordhin doonaa barnaamijyo samotabixin ah oo lagu soo celinayo dhallinyarada ku go'doosan waddamada dibadda.
- Waxa uu kordhin doonaa barnaamijyo shaqo-abuur oo loogu talo galay dhallinyarada soo noqdayaasha ah, sidoo kalena kor loogu qaadayo xirfaddooda iyo aqoontooda si ay ula qabsan karaan duruufaha nolosha.
- Waxa uu dejin doonaa barnaamijyo dhalinyarada lagaga wacyi galinayo khatarta suudalka (tahriibta).
- Waxa uu dejin doonaa nidaamka ka jawaabidda xaaladaha degdeg ah ee qaxootiga magangelyo-doonka iyo barakacayaasha (Emergency Response System).
- Waxa uu dejin doona nidaam lagu hubinayo bedqabka iyo caafimaadka dadka qaxootiga iyo magangelyo-doonka ah ee soo gelaya dalka.
- Waxa uu dib u habayn iyo casriyayn ku samayn doonaa nidaamka diiwaangelinta qaxootiga magangelyo-doonka iyo barakacayaasha.
- Waxa uu xoojin doonaa barnaamijyo suurto galinaya in xal waara loo helo dadka barakacayaasha ah sida:
    - Qorshe dadka barakacayaasha ah lagu gaadhsiinayo kaalmo dhaqaale si ay uga baxaan xaaladda barakacnimada sida fududaynta helitaanka maalgalin iyo shaqo abuur.
    - Hirgelin barnaamijyo kor loogu qaadayo aqoonta iyo xirfadda barakacayaasha.
    - Hirgelin barnaamijyo lagu siinayo deegaan iyo guryo jaban oo ay heelaan.
    - Qorshe dib u dajineed oo lagu celinayo deegaamada ay ka yimaadeen, xoolayn ama fududayn la qabsiga isdhexgalka bulshada ay la degenyihiin.
- Waxa uu xoojin doonaa barnaamijyo suurto galinaya in xal waara loo helo qaxootiga iyo magangalyo-doonka iyada oo lala kaashanayo hay'ada caalamiga ah.
- Waxa uu xoojin doona ka qayb qaadashada shirarka heer gobol iyo heer caalami ee lagu gorfaynayo arrimaha qaxootiga, magangalyo-doonka iyo barakacayaasha.
- Waxa uu dhiiri galin doonaa adeegsiga tiknoolajiyadda iyadoo la samaynayo nidaam lagu maamulo isla markaana lagu wadaago xogta.



5

# TIIRKA 5aad

# HORUMARINTA DAWLADNIMADA

# Horumarinta Dawladnimada

Dawladnimadu waa hannaanka ugu sarreeya ee suurtogaliya wada noolashaha qaybaha bulshada iyo ka qayb qaadashada go'aanada masiirigi ah. Himilada Xisbiga Kulmiye waa horumarinta dawladnimada iyo maamul wanaagga iyo tayaynta adeeg bixinta dawladda si kor loogu qaado nolosha iyo badhaadhaha bulshada Somaliland, iyadoo mudnaanta la siinayo adkaynta dimuqraadiyadda, daahfurnaanta, la dagaalanka musuqmaasuqa, iyo casriyaynta hababka go'aan qaadashada.


## Adkaynta Dimuqraadiyadda

Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay ku suntan tahay hormoodka dimuqraadiyadda wadamada Geeska Afrika. Muddadii Somaliland jirtay waxa si nabad iyo hufanaani ku jirto u dhacay saddex doorasho madaxwayne, laba doorasho barlamaan iyo sadex doorasho deegaan. Muddo xileeddii labaad ee xisbiga Kulmiye waxa lagu dedaalay in la sii wado, lana xoojiyo hannaanka dimuqraadiyadda iyada oo markii ugu horreysay la qabtay laba doorasho oo isa saar ah ama isku sidkan goleyaasha deegaanka iyo golaha wakiillada, waxa kale oo la qabtay kala saaristii ururrada. Waxa dalku u diyaar garoobayaa doorasho kale oo isku sidkan, taas oo ah tartanka doorashada madaxtinimada hogaaminta talada dalka ee Madaxwaynaha iyo kala saarista asxaabta iyo ururada si doorashada ka dib saddex xisbi u soo baxaan. Waxa guul wayn u ah Xisbiga Kulmiye in inta ugu badan kharashka doorashooyinkaas ku baxaya ay xukuumada xisbiga kulmiye dabooshay iyada oo lagu jiro duruufo dhaqaale oo adag.



**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** waxa uu sii xoojinayaa hanaanka doorashooyinka iyo dimuqraadiyadda sidaa awgeed:

- Waxa uu sii wadi doonaa adkaynta hannaanka dimuqraadiga ah ee dalka ka hanaqaaday.
- Waxa uu sii wadi doonaa xoojinta iyo dhawrista madaxbanaanida Komishinka Doorashooyinka Qaranka.
- Waxa uu xoojin doonaa barnaamijyada wacyigelineed ee muwaadiniinta lagu barayo xuquuqdooda iyo waajibaadkooda doorasho.



- Waxa uu wakhtigooda ku qaban doonaa dhammaan doorashooyinka golayaasha iyo madaxtooyada.
- Waxa uu sii xoojin doonaa isku dheellitirka iyo kala madaxbannaanida laamaha dawladnimada: golayaasha baarlamaanka, xukuumadda iyo garsoorka si loo xoojiyo dhowrsoonaanta sharciga ee heer kasta iyo wada- shaqaynta guud.
- Waxa uu xoojin doonaa daahfurnaanta, hufnaanta iyo isla xisaabtanka ee la xidhiidha arrimaha doorashooyinka.
- Waxa uu xoojin doonaa in la isku ixtiraamo kala duwanaanshaha rayiga iyo aragtida siyaasadeed qaab aan wax u dhimayn diinteena iyo dhaqankeena suuban.
- Waxa uu sii xoojin doonaa dadaalka sidii haweenka, dhallinyarada iyo dadka laga tirada badan yahay kaalin muuqata ugu yeelan lahaayeen golayaasha qaranka.
- Waxa uu dadaal badan gelin doonaa kor u qaadista wacyiga bulshada ee la xidhiidha fahamka hababka tartamada doorasho ee ku dhisan nidaamka dimuquraadiyada ee heer degmo si ay u helaan metelaad dhab ah.

## Horumarinta Maamul Wanaagga

Maamul wanaaggu waa lafdhabarta dawladnimo ku hanaqaaddo, sidaa darteed siyaasadda Xisbiga Kulmiye waxa saldhig u ah in hay'adaha dawladdu noqdaan kuwo ku dhisan hufnaan, daah-furnaan iyo isla-xisaabtan joogto ah. Xisbiga Kulmiye waxa uu aamminsan yahay in maamul-wanaaggu ka mid yahay tiirarka ugu mudan ee lagu beegsan karo horumarka ummadi hiigsanayso.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Waxa la aasaasay Hay'adda Caymiska Qaranka, Hay'adda Aagga Ganacsiga-ka-Caaggan Cashuuraha, Komishanka Tamarta Korontoda, Machadka Tababarka Duulimaadka Hawada iyo Machadka Dawladaha Hoose (LGI).*
- *Waxa la casriyeeyay, tayadiisana kor loo qaaday baasaboorka Somaliland.*
- *Waxa la aasaasay xarunta barashada waddaniyadda iyo dastuurka oo in ka badan* ***20,800*** *qof ay ka qalin jabiyeen, waxana la hirgeliyay barnaamijyada cawayska waddaniyada iyo dhambaalka waddaniyada.*
- *Waxa la hirgeliyay Barnaamijka Farriinta Dastuurka iyada oo la sameeyay nidaam lagu baranayo dastuurka macalin la'aan.*
- *Waxa la dhammaystiray maaddada barashada waddaniyadda oo lagu daray manhajka jaamacadaha.*



**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** isaga oo mudnaanta siinaya adkaynta maamul-wanaagga:

- Waxa uu sii amba qaadi doonaa dhismaha maamulka iyo kobcinta maamul-wanaagga, barnaamijka dib u habaynta shaqada iyo shaqaalaha dawladda.
- Waxa uu daadajin doonaa hannaanka maamul wanaagga oo ku dhisan daahfurnaan iyo isla xisaabtan kaas oo lagu fidin doono degmooyinka dalka oo dhan.
- Waxa uu ku dari doonaa barashada maamul wanaagga la xidhiidha manhajka waxbarashada ee heer jaamacadeed.
- Waxa uu sii wadi doonaa dedaalada lagu xoojinayo ka qayb qaadashada haweenka ee golayaasha deegaanka iyo maamulka dawladaha hoose si loo xoojiyo matalaadda haweenka ee geeddi socodka go'aan qaadashada golayaasha qaranka.
- Waxa uu samayn doonaa halbeegga nidaamka maamul wanaagga qaran (National Governance Code), iyadoo la kobcin doono ogaalka iyo wacyiga dadwaynaha ee la xidhiidha maamul-wanaagga.
- Waxa uu xoojin doonaa baadhitaanka, qiimeynta, dabagalka maamul-toosinta iyo sixidda wasaaradaha iyo hay'adaha madaxa banaan ee dawladda.
- Waxa uu xoojin doonaa adeegsiga tiknoolojiyada casriga ah si loo fududeeyo habka adeeg bixinta.
- Waxa uu sii wadi doonaa dhamaystirka xeerarka ku xusan dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.
- Waxa uu kor u qaadi doonaa aqoonta iyo xirfadda hogaamineed ee madaxda iyo masuuliyiinta xafiisyada dawladda.
- Waxa uu kobcin doonaa, tayeyna ku samayn doonaa aqoonta iyo xirfada shaqaalaha dawladda, si kor loogu qaado maamulka iyo xog ururinta.
- Waxa uu kordhin doonaa, korna u qaadi doonaa awooda Machadka Shaqaalaha Dawladda si waxbarasho tayo leh u siiyo shaqaalaha dawladda.

## La Dagaalanka Musuqmaasuqa

Xisbiga Kulmiye waxa uu aaminsan yahay in la dagaalanka musuqmaasuqu uu udub dhexaad u yahay hanaanka maamul wanaagga, daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka.

*Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:*

- *Waxa la xoojiyay awoodda shaqo ee xafiiska hantidhawraha iyada oo tirada baadhista ee lagu sameeyay xafiisyada dawladda ay kor u dhaafeen* ***294*** *baadhisood oo isugu jira dawladda dhexe iyo dawladaha hoose.*
- *Waxa la sameeyay hagayaal iyo habraacyo lagula dagaalamo musuqa si loo xoojiyo dabarrada lagu xakamaynayo musuq-maaasuqa.*
- *Waxa kale oo la hirgeliyay nidaamka caalamiga ee xisaabaadka ee dawladuhu adeegsadaan [IPSAS] oo waafaqsan halbeegyada caalamiga ah ee la isku raacsan yahay.*

**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** isaga oo mudnaanta siinaya adkaynta maamul wanaagga waxa uu sii ambaqaadi doonaa la dagaalanka musuqmaasuqa:

- Waxa uu gaadhsiin doonaa nidaamka daahfurnaanta iyo maamul wanaagga dhamaan mashaariicaha dalka ka socda ee aan hore u marin jirin nidaam xisaabeedka dalka.
- Waxa uu tayayn iyo casriyayn ku samayn doonaa hay'adaha u xilsaaran la dagaalanka musuqmaasuqa.
- Waxa uu xoojin doonaa adeegsiga tiknoolajiyadda casriga ah ee la dagaalanka musuqmaasuqa.
- Waxa uu tayayn iyo horumarin aqooneed ku samayn doonaa shaqaalaha hay'adaha ka shaqeeya la dagaalanka musuqmaasuqa.
- Waxa uu dib u habayn iyo xoojin ku samayn doonaa noocyada iyo qaababka baadhista ay u sameeyaan hay'adaha u xil saaran la dagaalanka musuqmaasuqa.
- Waxa uu sii xoojin doonaa xidhiidhka hay'adaha la dagaalama musuqmaasuqu ay la leeyihiin hay'adaha dhiggooda ah ee caalamka.

## Maamul daadajinta Adeegyada Bulshada

Nidaamka maamul daadajintu waa habka loogu wareejinayo dawladaha hoose mas'uuliyadda iyo adeeg bixinta. Ujeeddada maamul daadajintu waa in adeegyada dawladda loo dhaweeyo bulshada si loo daboolo baahiyaha u gaarka deegaanada, loona tayeeyo nidaamka adeeg bixinta, sidoo kalena la horumariyo maamulka degmooyinka, iyada oo la dardargalinayo ka qaybgalka bulshada ee go'aan gaadhista la xidhiidha qorshayaasha degmooyinka.

*Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:*

- *Waxa maamul daadejin lagu sameeyey adeegyada waxbrashada iyo caafimaadka* **8** *degmo doorasho, iyaga oo dawladaha hoose ee degmooyinku ay maamulaan* **70%** *miisaaniyada waxbarashada dugsiyada hoose/dhexe iyo xarumaha caafimaadka ee hooyada iyo dhallaanka.*
- *Waxa la xoojiyay maamulka gobollada iyada oo la kordhiyay miisaniyada gobollada, isla markaana la dhisay dhismayaal cusub, sidoo kalena dayactir iyo qalabayn lagu sameeyay dhamaan xafiisyada xarumaha gobollada.*
- *Waxa la dejiyay qorsheyaal ka jawaabaya baahiyaha aasaasiga ah ee bulshada sida; waxbarashada, caafimadka, biyaha, wadooyinka iyo nabadgalyada si loo horumariyo adeeg-bixinta dawladaha hoose.*

**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** isagoo mudnaanta siinaya xoojinta iyo dardargalinta maamul daadajinta:

- Waxa uu sii wadi doonaa xoojinta iyo dardargalinta hannaanka maamul daadajinta ee adeegyada bulshada sida adeegyada caafimaadka, waxbarashada, biyaha iyo korontada.
- Waxa uu horumarin iyo tayayn ku samayn doonaa nidaamka adeeg bixinta dawladaha hoose si loo hubiyo in adeegyada dadwaynuhu ay helayaan noqdaan kuwo ka jawaabaya baahidooda.
- Waxa uu sii wadi doonaa kobcinta iyo awood siinta maamulka heer gobol iyo heer degmo si ay u gutaan waajibaadkooda shaqo.
- Waxa uu dhamaystiri doonaa xeerarka iyo siyaasadaha lagama maarmaanka u ah maamul daadajinta.
- Waxa uu xoojin doonaa barnaamijyada dhiirigalinaya ka qayb qaadashada bulshada ee nidaamka maamul daadajinta.
- Waxa uu dhamaystiri doonaa gaadhsiinta nidaamka maareynta maaliyadda (FMIS) degmooyinka darajadoodu tahay A, B, iyo C si loo hagaajiyo nidaamyadooda maamulka maaliyadeed iyo howlaha xisaabaadka.
- Waxa uu hirgelin doonaa qaabka adeeg-bixinta (Service Delivery Modality) ee dhammaan degmo-doorashooyinka si loo xoojiyo awoodahooda bixinta adeegga oo qayb ka ah siyaasadaha maamul daadajinta.
- Waxa uu dib u habayn iyo casriyayn ku samayn doonaa nidaamka diiwaangelinta madaniga ah ee qaranka oo noqon doona mid dhameystiran.
- Waxa uu xoojin doonaa in adeegyada machadka dawladaha hoose la gaadhsiiyo dhamaan gobollada dalka oo dhan.

## Horumarinta Nidaamka Iibka Qaran

Iibka iyo hantida qaranka ee laga maalgeliyo miisaaniyadda qaranka waxa uu maraa qaab ku suntan tartan iyo daahfurnaan, waxana loo raacaa Xeerka Iibka Dawladda ee Xeer 82/2018. Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisii labaad waxa uu horumarin balaadhan ku sameeyay qaabka iibka iyadoo uu abuuray nidaam daahfuran oo lagu bixiyo qandaraasyada dawladda.

***Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:***

- *Dhaqngallinta Xeerka qandaraasyada qaranka Lr.82/2018.*
- *Mideynta nidaamka qandaraas bixinta qaranka, dhammeystirka habraacyada iyo xeernidaamiyaha Guddida Qandaraasyada Qaranka.*
- *Furitaanka xafiisyada gobolada ee Guddida Qandaraasyada Qaranka.*
- *Waxa si daah-furnaan ah loogu tartamay in ka badan **1,000** qandaraas.*

**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** isagoo mudnaanta siinaya adkaynta maamul-wanaagga iyo horumarinta nidaamka iibka qaranka:

- Waxa uu wax ka bedel iyo kaabis ku samayn doonaa habaraacyada iibka alaabooyinka, badeecadaha, dhismayaasha iyo xaraashka ay dawladdu leedahay.
- Waxa uu tayayn iyo casriyayn ku samayn doonaa nidaamka qandaraas bixinta qaranka iyada oo la adeegsanayo nidaamka elektrooniga ah ee iswada.
- Waxa uu daadejin doonaa nidaamka qandaraas bixinta qaranka ilaa heer degmo.
- Waxa uu samayn doonaa tababarro kor loogu qaadayo aqoonta qandaraas bixinta ee xafiisyada iibka ee xarumaha dawladda.
- Waxa uu si joogto ah u samayn doonaa dabagalka, baadhista iyo qiimaynta qandaraasyada dawladda.

## Horumarinta Garsoorka iyo Caddaaladda

Garsoor sugan iyo caddaalad loo dhan yahay oo dadka wada gaadha waa tiir ka mid ah tiirarka dawladnimo ee bulsho ku tanaaddo. Garsoor xaq ah ayaa lagu xaqiijin karaa in qof kasta oo muwaadin ahi helo caddaalad sugan sharciga hortiisa.

## *Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:*

- *Dhismaha afar xabsi oo cusub (Baki, Salaxlay, Hargeysa-haleeya, iyo Burco) iyo dhismaha xarunta dhaqan celinta da'yarta sharciga khilaafta ee Mija-caseeye.*
- *Dayactirka **Shan** xabsi (Boorama, Gabilay, Hargeysa, Berbera iyo Madheera).*
- *Waxa tababar la siiyay **450** sarkaal iyo maxaabiista oo kor loo qaaday aqoontooda.*
- *Adeeg caafimaad iyo dawooyin la siiyo maxaabiis ka badan **3,500** si bille ah.*
- *Waxa kale oo la sameeyay nidaamka iswada ee Nootaayooyinka (E-public Notary), kaas oo loogu talagalay; Ilaalinta iyo sugida cashuuraha dalka, Ilaalinta iyo sugida lahaanshaha hantida maguurtada ah, yaraynta khilaafaadka hantida maguurtada ah.*
- *Waxa tiro dhan **4,058** oo ah da'yarta sharciga khilaafta loo sameeyey xabsi-ka-leexin (Juvenile Diversion System).*
- *Waxa dalka laga hirgeliyey **sideed** xarumood oo loogu talagalay in ay xalliyaan khilafaadka madaniga ah, culayskana ka qadaan maxkamadaha dalka iyagoo oo ka hawal galay in ka badan **9,000** oo kiisaska madaniga ah, kuwaas oo afar ka mid ah ay yihiin xarumaha guurguura (Mobile ADR Centers) oo laga hirgeliyey degaanada ka fog magaalooyinka sida Ceel-afweyn, Yube, Fiqi-fuliye iyo Caynaba.*
- *Waxa in ka badan **4,850** oo dadka nugul ah la siiyay adeeg kaalmo sharci (legal Aid) oo lacag la'aan ah.*



**Xisbiga Kulmiye muddo xileedkiisa saddexaad 2024-2029,** isaga oo mudnaanta siinaya horumarinta garsoorka iyo caddaaladda:

- Waxa uu xoojin doonaa adeegga garsoor ee loo fidiyo carruurta, haweenka iyo dadka nugul si loo sugo inay helaan adeeg caddaaladeed oo hufan.
- Waxa uu kordhin doonaa aqoonta iyo xirfadda shaqaalaha garsoorka ee la xidhiidha tiknoolajiyadda, habraacyada maamul, habdhaqanka wanaagsan, hoggaaminta, xuquuqda aadamaha, shareecada islaamka, qoraalka go'aammada garsoorka, amniga iyo dembiyada abaabulan si kor loogu qaado adeegga maxkamadaha iyo maaraynta kiisaska.
- Waxa uu kordhin doonaa barnaamijyada lagu gaadhsiinayo adeegyada caddaaladda dadka nugul gaar ahaan kuwo ku nool deegamada fogfog ee dalka.
- Waxa uu kor u qaadi doonaa dhawrista xuquuqda aadamaha ee maxaabiista iyo daryeelkooda nololeed.
- Waxa uu dejin doonaa hagayaal iyo habraacyo lagu kormeero xabsiyada, saldhigyada booliska, iyo goobaha dhimirka ee gaarka loo leeyahay si loola socdo xaaladda dadka ku jira goobahaas.
- Waxa uu tayayn doonaa isla markaana xoojin doonaa isku xidhka iyo wada shaqaynta bahda caddaaladda iyo garsoorka.
- Waxa uu sii wadi doonaa tababarrada aqooneed ee dhinaca sharciga ee ciidanka asluubta.
- Waxa uu xoojin doonaa barnaamijyada tababar ee loogu talo galay kobcinta aqoonta iyo xirfadaha kala duwan maxaabiista ku jira xabsiyada.
- Waxa uu xoojin doonaa adeegsiga tiknoolajiyadda casriga ah ee maaraynta iyo wadaagidda xogta garsoorka, iyada oo lagu tabababarayo garsoorayaasha dembiyada ka dhasha tiknoloojiyada casriga ah iyo baraha bulshada.
- Waxa uu curin doonaa siyaasadda qaran ee ka hortagga dambiyada si loo yareeyo dambiyada, loona fududeeyo ka hortaggooda.
- Waxa uu sii wadi doonaa ballaadhinta, dib u dhiska iyo casriyaynta xabsiyada dalka si ay u noqdaan kuwa la jaanqaada nidaamyada xabsiyada caalaamka.
- Waxa uu dhisi doonaa siddeed xaruumood oo cusub oo loogu talo galay xalinta khilaafaadka madaniga ah, sidoo kalena waxa la ballaadhin doonaa kuwii hore u jiray, laguna dari doonaa xarumaha guurguura.



6

# TIIRKA 6aad

# MAARAYNTA DEEGAANKA & ISBEDELKA CIMILADA

# Maaraynta Deegaanka iyo Isbedelka Cimilada

Ilaalinta iyo maaraynta deegaanku waa nolosha qaybteeda ugu mudan. Waxa sannadahan danbe adduunka oo dhan la isku waafaqay in saamaynta isbedelka cimiladu ay lagama maarmaan ka dhigtay in feejignaan dheeraad ah la siiyo sidii wax looga qaban lahaa, korna loogu qaadi lahaa qorshaynta talaabooyin lagu illaalinayo maaraynta deegaanka, sidoo kale ka hortagga iyo u diyaargarowga saamaynta isbeddelka cimilada.

*Muddo Xileedkii labaad ee Xisbiga Kulmiye waxa u hirgalay:*

- *Qaybinta iyo beerista in ka badan **3,000,000** oo geed taas oo ay barbar socotay barnaamijyo wacyi-gelineed oo dadka lagu baraarujinayo illaalinta dhirta.*
- *Waxa la dhisay xarumo kaydka dhirta ah oo dhamaan gobollada dalka ah, waxana la diiwaan geliyay **52** seerayaal hore u jiray ah iyadoo **14** ka mid ah dib gacanta xukuumadda loogu soo celiyay lana xayndaabay.*
- *Waxa **25%** hoos loo dhigay jarista dhirta laga sameeyo dhuxusha iyadoo loo maray hirgelinta qorshaha samaynta girgirayaasha dhuxusha beekhaamiya kuwaas oo tiro dhan **25,000** xabbo loo qaybiyay bulshada.*
- *Waxa shaqada illaalinta deegaanka iyo duurjoogta la gaadhsiiyay heer gobol iyo degmo.*
- *Waxa la sameeyay qorshayaal lagu dhiiri-gelinayo isticmaalka tamarta la cusboonaysiiyo taas oo goobo badan oo bixiya adeeg bulsho lagu rakibay si loo yareeyo isticmaalka xaabaysiga iyo dhuxulaysiga oo sababa jarista dhirta.*
- *Waxa la qabtay **862** xayawaan duur-joog kala duwan oo dalka sifo sharci daro ah looga dhoofinayay.*
- *Waxa la dhiirigeliyay dhiraynta iyo kor u qaadista soo celinta kaymaha iyadoo la sameeyay maalin heer qaran oo u astaysan dhiraynta iyo nidaamka geed beer- rajo beer.*
- *Waxa la sameeyay xarunta kaydka hiddo-dhireedka lagu kaydiyo abuurka noocyada dhirta kala duwan (Botanicgarden) ee dalka si looga ilaaliyo inay dabar go'aan.*

**Xukuumadda Xisbiga Kulmiye muddo xilleedka saddexaad** 2024-2029 isaga oo mudnaanta siinaya Degaanka iyo isbedelka cimilada:

- Waxa uu 25% yarayn doonaa isticmaalka dhuxusha iyo jarista dhirta qoyan iyadoo kor loo qaadayo hababka lagu dhiiri-gelinayo isticmaalka tamarta la cusboonaysiiyo iyo soo dejinta gaasta wax lagu karsado oo jaban.



- Waxa uu ballaadhin doonaa barnaamijyada ilaalinta seerayaasha qaranka iyo badbaadinta xayawaanka duurjoogta naadirka ah iyo kuwa sii dabar go'aya.
- Waxa uu kordhin doonaa qoondada miisaaniyadeed ee ilaalinta dhirta iyo daaqa si dib loogu soo nooleeyo kaymihii, loona yareeyo saamaynta taban ee isbedelka cimilada.
- Waxa uu dejin doonaa qorshe lagu beerayo in ka badan shan milyan oo geed oo nafci u leh dadka, xoolaha iyo duurjoogta, sidoo kalena ka hor tagta nabaad guurka ciidda.
- Waxa uu dib u eegis ku samayn doonaa siyaasadda ilaalinta degaanka iyo duurjoogto, si kor loogu qaado daryeelka deegaanka sidoo kale loo adkeeyo ciqaabaha ka dhalanaya jarista dhirta qoyan, dabar-goynta iyo ka ganacsiga ugaadha.
- Waxa uu curin doonaa siyaasadda isbedelka cimilada iyo habraacyada bedqabka deegaanka badda, si wax looga qabto saamaynta taban isbedelka cimilada iyo sumowga baddu ay ku leeyihiin noolaha ku jira badda.
- Waxa uu dejin doonaa barnaamijka qurxinta iyo dhiraynta magaalooyinka, iyo maaraynta qashinka oo ay xukuumada dhexe iyo dawladaha hoose iska kaashanayaan, sidoo kale hubinta saamaynta fidista magaalooyinka iyo mashaariicda horumarineed ay ku yeelan karaan deegaanka iyo duurjoogta.

- Waxa uu samayn doonaa qorshaha qaranka ee la qabsiga isbedelka cimilada kaas oo laga dheegan doono hawlaha badbaadinta deegaanka iyo u adkaysiga isbedelka cimilada.
- Waxa uu joogtayn doonaa shirarka heer qaran ee lagaga arrinsado isbedelka cimilada, kuwaas lagu dejiyo qorashayaal loogu talo galay saamaynta isbedelka cimilada iyo u adkaysigeeda.
- Waxa uu xayndaab ku samayn doonaa dhamaan seero-kaymeedyada iyo seero-xiliyeedyada dalka ka jira si xilliyada adag ee abaaraha ama duruufaha ka dhasha saamaynta cimilada loogu samato bixiyo xoolaha nool iyo duur-joogta.








INTERNATIONAL




















# U CODEE KULMIYE

Taageer Difaaca Qaranka,

Horumarka iyo Aqoonsiga


KULMIYE